# CAAFIMAAD QABKA KORITAANKA MASIIXIGA

HEALTHY CHRISTIAN GROWTH

**MERF Grace & Truth Somali Radio Field translated!**

**@2021**

**MERF Ethiopia**

Masiixiyaddu waa shakhsi qof ahaanayd oo ka mid ah kuwa ay u bilaabantay nonlosha cusub ee Masiixa ku jirto. Laakiinse, sida nolosha jirka, nolosha ruuxa waa lama huraan in ay ku horumarto jidka quman ee faya qabka.

Masiixigu waa sida ilmo yar oo u baahan koritaan. *"oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah, si aad ugu kortaan xagga*

*badbaadada,"* (1 Butros 2:2).

Sida caadiyanka ah ilmaha yare ee ku koraya faya qabka wuxuu u baahan yahay cunto iyo nafaqo, jacayl iyo xanaanno uu u ku kordhinayo xoogaysiga xagga murqaha koritaankooda, si ay awood gu yeeshaan ka hortagidda cudurada iyo jirrooyinka. Waynu ku mahadinaa inteenna badan inaan helo xannaanadan oo kale; kuwa aan nasiibka u yeelan aalaaba waxay la rafaadaan inta noloshooda ka hartay in ay ka kabsadaan wixii soo maray nafaqa xumidii waayadoodii hore da'doodii. Sidaasi oo kale mid la mid ah bay runtii tahay oo ay la mid tahay nolosha Masiixiyiintuna! Ilaa iyo in ku filan horumarkoodii caafimaad ee caruurnimo sida ay ahayd qiyaasteeda. Ruuxiyaddeena taamka ah laga yaabo inay ku xirnaato heerka qaangaarnimo ee Masiixigu, laga yaabe

mararka qaar koritaanka iimaankeenna masiixinimo inay si fiican u korin ka qiyaasteeda miisaan la'aan, dheellitir la'aan aysan helin nolosheenna darted.

Qormadan gaaban ee ku jirta buuggan yar wuxuu sharaxaad kooban inoogu qeexayaa siduu Ilaah u sameeyey waxyaabaha ku saabsan koriimada. *"Taa aawadeed waxba ma aha kan beeraa, ama kan waraabiyaa. laakiin waa Ilaah kan koriyaa"* (1 Korintos 3:7).

Laakiinse, inta ka horreysa ka fikirriddeeda waxyaabaha qaarkoo iyo waddooyinka loo maareyn karo inaan ku korno koritaanka ruuxiga ah, waxaannu ku qasbannahay inaan su'aallo dheeraad oo lama huraan ah inaan iska weyddiinno:

Maxaynnu ku koreynaa marka hore?

Midho dhalkeeda ama wax soo saarkeeda ugu dambeynta muxuu yahay?

Maxaysa ugu fadhidaa nolosheyda?

Su'aalahaa jawaabtooda waxaa la helay qarniyo sii horreeye oo la soo dhaafay ka hor, waxayna ku can baxeen ereyga afka-qalaad loogu yaqaanno (*Short Catechis*m) oo la micne ah buug su'aallo iyo jawaabo ku saabsan siiba iimaanka masiixiyadda.

Dhamaadka Aadanahu ugu damveynta wuxuu ku soo ammaanta Ilaah iyo inuu naalleeyo/maqsuudo Isaga weligiiba.

Sidee baan Ilaah ku ammaani karnaa? “Jawaabteeda kooban ee uu Kitaabka Qudduuska ka bixiyeyna waxay ina leedahay: Xagga koritaanka lagu korayo in badan oo badan waa xagga u - ekaanta Ciise Masiix”

Wiil yar oo ka mid ahaa hooyo afar caruur lahayd midkood ayaa dhakhtar ilkeed u baahday.

Dhakhtarkii Ilkaha inankii afar ilkood buu ka saaray. Waxaase la ogaaday kol dambe inay wiilkii yaraa ilkihiisii bad qabeen markii horeba intaan laga saarin. Laakiinse, ilkihiisii qaarkii kale weli wey u soo baxayeen oo waxaan ka walaacnay inay wax u dhimaan qaabkii wajegiisa ka dib markii xaaskeyga u sheegtay dhakhtarkii ilkaha in lga yaabo in wiilku uu ilkaha afarta ah ee laga saaray u keenni karto mustaqbalka foolxumo, wuxuunna u caddeeyey dhaktarkii inaysan wax u dhimeyn qaab dhismeedka koritaaanka wajiga wiilka arrintan ilkaha laga saaray awgeed.

Tanina waa sidaas oo kale xagga ruuxeenna masiixinimo. Waxaan u ekaan doonnaa sida

u-ekaanta Masiixa; markii ay dadka inala kulmaan oo ayna ina ogaadaan , waxay markiiba garan karaan dabeecadaha u-ekaanta inaga dhexeysa inaga iyo Masiixa. Laakiinse, weli waxaan ku koreynaa sidii qoyskaa u ekaantiisa ay tahay. Sida Rasuul Bawlos uu ku faahfaahiyey markii uu lahaawaxaynu ku dhismeynaa koritaanka Ilaah aan ku qaan-gaarno dadaal badannna ka dib aan ku gaari doonno xagga qiyaasta sida ay tahay buuxnaanta Masiixa.

"*ilaa aynu wada gaadhno midnimada rumaysadka iyo aqoonta Wiilka Ilaah oo aynu noqonno dad waaweyn xagga qiyaasta koridda ee buuxnaanta Masiixa*" (Efesos 4:13),

Oo Haddaba "*aynu wax walba ku korno xaggiisa, kan madaxa ah oo ah Masiixa*" (Efesos 4:15).

Qorshaha Ilaah eer inoo ahaatayna waa inaan u ekaano suuradda wiilkiisa.

"*Waayo, kuwuu hore u yiqiin wuxuu haddana hore ugu doortay inay u ekaadaan suuradda Wiilkiisa, inuu isagu curad ku noqdo walaalo badan dhexdood."* (Rooma 8:29).

Qaan-gaarnimada Masiixixiyaddu waa u–ekaanta Masiixa.

Horumarka arrimaha ku saabsan koritaanka Masiixinimada waxay ka muuqan kaartaa wajiyadeenna sida u ekaanta ta MAssiixa oo weynu u arkeenna sida muraayadda lagu arko wajiyadeenna xagga dabeecadda oo isu-ekaaanta ayaa lay noo bedelayaa sida ku cad Ereyga Ilaah: " *Laakiin dhammaanteen innagoo aan indho shareernayn, ammaanta*

*Rabbiga ayaynu arkaynaa sidii oo muraayad lagu arko, oo*

*isu-ekaanta ayaa laynoo rogayaa, ammaan ilaa ammaan, sida*

*tan xagga Rabbiga Ruuxa ah ka timaada*." (2 Korintos 3:18).

Laakiinse, sidee bay tani ku dhici kartaa?

Xagga nolosha jidhka, koridda waxay u baahan tahay nafaqeyn, jimicsi jidheed, iyo cimilo ku haboon nolosha. Si la mid ah sidaas oo kale runtii waa ku dhaqanka nolosha masiixiyadda waa haddii aan si saraaxad leh u isticmaalno! Oo badqab u ah qaan-gaarnimada ruuxiyadeed.

## NAFAQAYNTA:

Waxaynu nahay waxa aan cunno, sidaas waxaa yidhi Falsafad yaqaan ku takhasusay cilmiga Insaaniadda ee aadanaha, kaas oo u arkayay ineysan jirin wax dhaafsiisan hunguriga jira ee la

cuno, si la mid ah sida ay la tahay kooxaha. Waxaaase jira dalag dadku beertaan oo ayna cunaan oo ku qotonta odhaahda ereyadiisa, sababtaana weeye sababta uu u leeyahay "Waxaannu nahay wax aynu cunno." Taas oo la micne ah haddii aan cuni weyno cunto dheelli tiran waxaa suurta gal ah inay khatar u noqoto caafimeedkeenna. Waxaynnu wax ku nahay waxa aan cunno; haddaba sidaas oo kale waxaa yiri Ciise Masiixa.

"*Ha u shaqaynina cuntada hallaabaysa, laakiin u sha- qeeya cuntada sii jiraysa ilaa nolosha weligeed ah ee WiilkaAadanahu idin siin doono, …………. Anigu waxaan ahay kibista nolosha. Kii ii yimaadaa ma gaajoon doono, kii i rumaystaana ma harraadidoono weligiis. ……*

*Anigu waxaan ahay kibista nool ee samada ka soo degtay. Haddii qof uun kibis- tan cuno, weligiis wuu noolaan doonaa."*
( Yooxanaa 6: 27,35,51 ).

Masiixiga dhabta ah koriddiisu waxay ku tiirsan tahay hadba sida ay tahay quudinta Masiixa xagga ruuxa. Simon Butros ka mid ahaa xertii Ciise Masiixa ayaa cashar wanaagsan wax ka bartay arrintaasi, wuxuuna inagula dooday dareenkan si ficliyan ah:-

"*oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah, si aad ugu kortaan xagga badbaadada, haddii aad dhadhamiseen in Rabbigu raxmad leeyahay*," ( Butros 2: 2-3 ).

Caanaha aan u  baahanahay waa Ereyga Ilaah barashadiisa, Kitaabka Qudduuska oo ah middaan tabayno. Bal xasuuso ilmo yar oo dhallaan ah oo hoos jiifa hooyo waalid mar curad ah oo gaajo darted la oynaya? Wax alla wax kale oo ay ku qancin kartaa ma jirto oo aan ka ahayn cuntaduu tabayo mooyee. Sawirkaa oo kale ayaa ka muuqata maskaxda Butros waxa ay ku fikireyso sidii ilmahaa; Ahow sida ilmahaa yar ee dhallaanka ah, oo ha u ahaato doonistaada waxbarsahda Ereyga Ilaah. Dayaanka fikirka maskaxda Yuudas guuxeeda wuxuu ina leeyahay:

"*Laakiinse, gacaliyayaalow, nafsaddiinna ku dul dhisa rumaysadkiinna aad qoduuska u ah, oo Ruuxa Qoduuska ah ku tukada"* ( Yuudas: Aadda 20 )

Haddaba side baan uga guuleysan karnaa? Kitaabka Qudduuska ayaa jawaab inaga siinaya *Qoraalkiisaa ina leh sidatan: "Qorniin kastaa wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda, iyo canaanashada, iyo hagaajinta,*

*Iyo edbinta xagga xaqnimada; in ninka Ilaah u ahaado mid dhan oo aad loogu diyaariyey shuqul kasta oo wanaagsan."* (2 Timoteyos 3: 16-17)
Masiixiyiinta waa sida xirmo qalab ah oo si gaar u khuseysa xagga adeegga waxbaridda Kitaabka Qudduuska. Ereyada micneysan ee uu inala qaybsaday Rasuul Bawlos waa caadiyan xididka naxwaha Injiilka ee ay isticmaaleyn ebed xertii ugu horreysay ee xertii Ciise Masiix diyaargareyntoodii oo la mid ahayd tii diyaargareynta shabakadahoodii Jilaabka – Nadiifinta, Dayactirka, Isku xidhkooda si loogu diyaariyo kaluumeysiga habeenka dambe ee xiga maalintaa.
Tani waa sawir fiican oo ka turjumaya saameynta qoraalka. Afar arrimood ayaa oo inoo diyaarinayo u adeegidda Sayid Ciise Masiix:

**WAXBARIDDA**

Dabiiciyan dembiga ayaa fikradda iyo aragtida maskaxdeenna dahaadh madow saaray oo ina khiyaameeyey. Maxaa yeelay,

"*Iyagoo Ilaah garanaya ayayan isaga Ilaah ahaan u ammaanin. umana ay mahad naqin laakiin fikirradoodii waa xumaadeen, qalbigoodii garaadka la'aana waa madoobaaday. ….. Maxaa yeelay runtii Ilaah bay been ku beddeleen, oo*

*waxay caabudeen oo u adeegeen ummadda in- tay caabudi lahaayeen kan uumay oo weligiis ammaanta leh. Aamiin."* (Rooma 1:21,25).

Laakiin iminka waxaynu nahay Masiixiyiin oo waxaa inagu waajib ah inaan baranno sidii aan fikir hagaagsan oo quman ugu fikiri lahayn iyo inaan raacno sida ku qayaxan Ereyga Ilaah ee uu inaga abuuray u ekaantiisa arigtideeda ;
"*Oo Ilaah nin buu ka abuuray araggiisa, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga;*
*lab iyo dhaddig ayuu abuuray"* (Bilowgii 1:27).
Ilaa keliya juwa ilaahooda yaqaano uu ka xoojinayo
"*Oo kuwa wax baas oo axdiga ka gees ah sameeya ayuu sasabasho ku qalloocin*
*doonaa; laakiinse dadka Ilaahooda yaqaan way xoog badnaan doonaan, oo*
*waxyaalo waaweyn bay samayn doonaan*." (Daanyeel 11:32).

Waxaan u baahanahay inaan garanno waxyaalabaha ku saabsan Ilaah sida dabeecaddiisa iyo doonistiisa, iyo waxa inagu saabsan ka bani'aadmi ahaan iyo dembiyadeenna iiyo waxa ku saabsan Masiix iyo nimcadiisa iyo nolosha rumeysadka dunida yimid. Waxaan u mahad celininayaa oo aan ugu shukri naqaynaa Ilaah inuu inoo muujiyey dhamaan

waxaan uga baahnayn garashadiisa qoraalka Kitaabka Quduuska !

La yaab ma leh Butros markuu inoo sheegayey tabidda waxbaridda inoogu leedahay muhiimadda dulucda ujeeddadeeda. Mana jirto wax laga  bedeli karo waxbarashadaa tilmaan bixinteeda.

Marmarsiinyana uma hayno inaan ku dhacno tababarka waxbariddan ama inaan garan weyno ujeedkeeda.

**CANAANSHAHA**

Waxbaridda Ereyga Ilaah waxay si toos ah ula hadashaa maskaxdeenna, laakiins intaa kuma eka ee waxay la ahadashaa damiirka dareenka caqliga qofka miyirkiisa. Taas oo ina tuseyso halkii aan ku khaldannay. Qofna ma jecla in la baarbaari oo su'aalo laga weyddiiyo hab nololeedkiisa dhanka xumaanta amaba lagu eedeeyo khaladaadka ay naftiisu sameysay.

Laakiinse, inagu inta aan masiixiyada ku koreyno waxaannu dareenaa xanuun badan oo muggiisa xaddi lahayn oo aan ku aqoonsanno dhagartayadii. Si aayar aayar ah oo tartiibsan

ayaan ku baranaa in ku joojijino  uguna dahwaanno Ilaah. Ilaahna wuxuu taa u isticmaalay inuu inagu dhex tuso Ereygiisa Qudduuska ah ee qoran inta ann ku guda jirno barashadeeda.

Akhrinata Kitaabka Qudduuska waxaan ku arkeynaa casharka ah wixii uu sameeyey Nabi Daa’uud markii uu Ilaah kula hadlay farriin uu u keenay isla nabi kale oo ay isku xilli ahaayeen oo la odhan jiray Nabi Naataan. Marka hire waxay inoola muuqataa in si hufan u dhageysano oo aad aan ugu fiirsanno qoraalaka Qudduuska qaybihiisa khuseeya dembiyada iyo dhicitaanka kuwa ka soo muuqanaya bogagiisa. Ka dibna waxaa inoo suuragalaysa inaan maqalno codka xoogga leh iyo dareenkeeda ay weheliso farriinta far ku fiiqidda ruuxyada ina eedeynaya inaga.

Ilaahan wuxuu leeyahay Aniga weeye kan kula hadlaya adiga sida ka muuqata aayaddan hoose.

*Kolkaasaa Naataan wuxuu Daa’uud ku yidhi, ninkaas waa adiga. Rabbiga ah Ilaaha reer binu Isra’iil wuxuu leeyahay, waxaan kuu subkay inaad ahaatid boqor boqor ree binu Israa’iil u taliya, gacantii Saa'uul na waan kaa samata bixiyey*.” ( Saamuu’eel labaad 12:7).

Ilaah baan inaga joojiya dhabahii qaloocanaa ee aan ku soconay oo dib inooga soo celiyey tubtisii wanaagsanqayd. Waa dhacdo xanuun badan; Balse haddaba weliba waa Daaweyn ama caafimaad siin dabiibid ah. Weligayagana ma gaari karno meesha aan tiigsanayano ee aan ku soconay haddii ay waddada/jidka inaga khaldan yahay. Sababtaa daraadeed, nacas baan ahay haddii aan garan waayo Ereyga ina leh " *Ereygaagu wuxuu cagahayga u yahay laamabad waddooyinkayagana iftiin*" (Sabuurrada 119:105).

**HAGAAJINTA**

Ereygan "Hagaajinta" micno ahaan waxaa loo fasiri karaa dhowr micnood xagga luqadaha adduunka qaarkood oo ka mid tahay luqadda Af-Soomaaliga, ficila ahaan wuxuu la micne yahay "Soo Celin" sidii uu rasuul Bawlos ula jeeday. Wuxuuna xambaarsanaa ka micno oo markeedii hore xididkeedu ka soo jeeday luqadda Giriigga oo waagaa ahayd luqad caalami ah oo dadka intooda badan ee ku noolaan jiray Bariga dhexe ay ku hadli jireen – ereygan ah "Orthodontics" turjumidaad ahaanna ah (lko lakab ahaa oo meeshoodii lagu soo celiyey).

Sixidda ama hagaajinta waa bogsiinno ee ma aha xusuus maskaxda ku soo noq noqota siiba xasuus xun ah. Bawlos wuxuu ina leeyahay oo farriintiisu tahay awoodda bogsiinta iyo dib u soo celinta qalbi jabkeenna iyo beddelidda  qaab jaheedka nolosheennii.

Tanina waa ta aasaasiga laga maarmaanka u ah koritaanka Masiixiyiinta, iyo weliba waa dhiirrigelin weyn wax u ah kulanada Masiixiyiinta inay arkaan dadkiyoo isbedeshay dabeecadoodii oo lagu nadiifiyey awoodda Ereyga Ilaah.

## EDBINTA XAGGA XAQNIMADA

Ereyga Ilaah ma aha oo keliya dugsi hoose oo laga helo caano, oo weliba waa sida lagu jimicsado oo adkeysa murqaha jidhkaaga. Barashadiisa, fahmiddiisa, aaminaaddiisa iiyo addeecaddiisa waa mowjad coded oo sare u qaadda xagga murqaha ruuxa oo dardargeliya jawaabta nimcada nolosheenna. Waamna wax kor u qaadaya oo sii kordhinaya qorshihii Rabbiga Ilaah sabatoo ah waxaannu soo gaarnay xilli aan ka fikirno, ku dhaqanno oo aan weliba dareenno jidka ku quman Ilaah ee Kitaabiga ahmiddanna run ahaantii waxay noqotay Aalad khuseysa nolosha aan ku nool nahay eek u hoos

jirta hagidda gacanta Ilaah, sidii John Newton oo kale intuu iska daayay ka ganacsigii dadkii addoonsiga ku bedelmay qoraa qasiidadeed Ilaah amaan ah oo aad loo yaqaano. Haddaba wuxuu isweyddiiyey ma sidaa buu Ilaa Rabbiga ka filayey? ….. Guud ahaan wuu hagaa oo toosiyaa dadkiisa, wuuna awoodaa inuu iyaga baryadooda u jawaabo, sida uu yahayiftiinka Ruuxiisa Qudduuska, kaas oo awood u siiya iyaga inay fahmaan oo ay jeclaadaan Ereyga Ilaah. Ereyga Ilaah ma aha wax loo isticmaalo sidii bakhtiyoo nasiib oo kale; ama ma aha sidii wax loo qaabeeyo waxbariddeena mid cadcad u jarjaran oo biro furfuran ah oo aan isu haysanin qaabkii kolkii hore ay ahaayeen; Laakiin, waa wax qaabeysan oo laynoogu qaabeeyey hab qorsheysan oo u wanaagsan mustaqbalkeenna oo lagu xeeriyey xukunka iyo saameyntiisa, sidaas la ajligeedna saameeya toosinta oo hagaajiya.

Qoraalka Quduuska waa mid dhammaan xambaarsan waxaan u baahanahay inaan ka ogaanno nidaamka nolsha ee faa’idada, farxadda iyo midho dhalka nolosha Masiixiyadda. Waxaa oo dhanna waa asaaska daruuriga qalabkan halkan yaalla eek u jira bogaggan.

Haddaba waa wax si cad uga dhex muuqda Kitaabkeenna Qudduuska ah. Waxa uu xambaarsan yahayna waa caano ruuxi

ah oo aan tabeynay in aan helno. Haddii aan ka hornimaanno inaan akhrinno bandhigga sharxidda Qoraalka Quduuska. Inaguma laasimo inaan la yaabno hadii aan la kulanno dhibaatooyin soo wajaha koritaankeenna. Sabinimada waa wax soo jiidanaya ilmuhu markuu ilaa inta uu aadka u yaryahaysabiga. Shalaytada sabigu ee ku jirta dadka waaweyn.

Siday doontaba ha ahaatee, bukaanka cudurka ku jiraa daaweyn in loo helo Ayaan u baahanahay. Sow taasina cunto xumo/nafaqo darro ma aha? Baahise ma u qabtaa Kitaabka Quduuska? Runtii waa wax ahmiyad weyn u leh Masiixiga u baahan.

## JIMICSIGA/LEYLIGA

Jimicsig jidhka wuxuu xoog iyo awood u yeelaa wadnaha qofka. Taa la'aanteedana koriddeenana way daciifi, oo dabacsanaan jiljileecsan bay noqonaysaa. Runtii middan waa mid la mid ah marka aan ka eegno xagga ruuxa. Hadda ka hor waxaan maqlay sheeko ku saabsanayd  xeer u yaalay cayaaryahan ka mid ahaa kuwa  magaca ku leh shirkad ka shaqaysa cayaaraha qoob ka cayaarka jaanta ee dalka Ruushaka laga cayaaro. Kaas oo yidhi: 'Haddii aan tababarka

maalin keliya ka baaqdo, saameynteeda waxaa garan kara aniga keliya; Haddiise aan laba maalmood aan ka baaqdo tababarka carbiska, saameynteeda isbedelka igu dhacay waxaa garan kara maamulka shirkadda; Haddise tabarka aan ka maqnaado maalmo dhowr ah, daawadayaasha way garan karaan inuu isbedel igu dhacay oo aan sidii hore la iigaga bartay aan ahayn. Tababar la’aan kuma ilaalin kartid inaad halka ugu sareysa joogtid haddii ay noqoto; dareen wanaagsan, dheereyn xawaare, nomco wakhti wada jaan go’an. Ugu yaraan taasina ma aha mid fikirka caafimaadka ruuxiga ah inuusan la mid ahayn kan jidhka oo kale. Masiixiyiinta da’da weyn waxay isticmaalaan meesha ugu sareysa eek u dhaqan joogteenta ruuxiyadda wanaagsan ee dhamaadka. Laakiinse, su’aasha waxay ay atahay waa maxay jimicsiga/layliga ruuxiga ah?

## CAABUDAADDA

Waxaa keliya ee ugu muhiimsan inay ku dhaqanto noloshaada waxaa ugu horreysa waa caabudidda Ilaah. Waana wixii markeedii horeba loo abuuray oo lagu abuuray inay Alla barido waligeedba, dhan walba oo la eego, oo ay ammaanto Rabbiga. Bal eeg markii uu lahaa Sabuurlaihii sidatan: “ Naftaydoy, Rabbiga ammaan, Oo inta igu jirta oo dhamay,

ammaana magaciisa Qudduuska,“ (Sabuurrada 103:1). Wuxuu u hadlayaa oo kale sidii oradyahan waayay meeshii ugu horreysay xaaladdiisii, oo ay noloshiisii xagga gudaha kari weyday inay u hogaansato ammaanta Rabbiga. Qalbigiisii oo idilna Ilaah buu hoos geeye. Tani xaqiiqdii waxay la mid tahay noloshiisii oo idil inuu siiyey oo uu u hibeeyey Ilaah. Taasina waxay u cod ektahay sida ku qoran aayadahan:

“*Haddaba, walaalayaalow, waxaan idinku baryayaa Ilaah naxariistiisa inaad jidhkiinna Ilaah u siisaan sida allabari nool oo qoduus ah oo Ilaah ku farxo, waana cibaadaysigiinna caqliga leh. Ha u ekaanina dadka ifkan, laakiinse ku beddelma cusboonaanta maankiinna inaad hubsataan waxa ay tahaydoonista Ilaah oo wanaagsan oo isagu ku farxo oo kaamilka ah.”* (Rooma 12:1-2)

Taasi weliba waxay la micne noqonaysaa mid u gaar ah inaan ujeedkeenna iyo awoodda qof ahaanayd inaan xoogeyga Ilaah ku tiirsanaado oo aan qasiidooyin hello iyo gabayba aan ku ammaanno inaga oo baryayna. Sabataasina weeye sababta uu inoogu hegeliyey hal maalin oo ka mid maalamaha toddobaadka inaan ka nasanno howla maalmeedkayaga sida ku cad Ereygiisa Qudduuska ah:

"*Maalintii toddobaadna Ilaah wuu dhammeeyey shuqulkiisii uu sameeyey; oo maalintii toddobaad ayuu ka nastay shuqulkiisii uu sameeyey oo dhanba. Oo Ilaah wuu barakadeeyey maalintii toddobaad, qoduusna wuu ka dhigay; maxaa yeelay, maalintaas ayaa Ilaah ka nastay shuqulkiisii uu sameeyey ee ahaa abuuridda oo dhan.*" (Bilowgii 2:2-3).

Iyo waxaa kale oo qoran aayadahan:

"*Xusuuso maalinta sabtida, inaad qoduus ka dhigto. Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada,*
*ama addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira;*
*waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakadeeyey maalintii sabtida ahayd oo qoduus uga dhigay."* (Baxniintii 20:8-11).

Waxaa weliba oo kaloo qoran Ereyadan:

"*Haddaad sabtida cagtaada ula hadhid si aadan maalintayda qoduuska ah damacaaga u samayn, aadse sabtida ugu yeedhid farxad, iyo tan qoduuska ah ee Rabbiga, oo sharafta badan,*

*iyo haddaad sabtida sharaftid, adigoo aan siyaalahaaga samaynayn, ama aan damacaaga daba galayn, ama aan hadalkaaga ku hadlayn, markaasaad Rabbiga ku farxi doontaa, oo anna waxaan ku marsiin doonaa meelaha sarsare ee dhulka, oo dhaxalkii awowgaa Yacquub ayaan kugu quudin doonaa, waayo, afkii Rabbiga ayaa saas ku hadlay."* (Ishacyaah 58:13-14).

Oo maalintaa iyada ah waa maalin la isugu soo ururo in la ammaano Isaga waa Ilaahiye inta ka mid ah qoyskiisa, oo la is dhiirrigeliyo oo wax ku saabsan Ereygiisa la isbaro.

*"Oo erayga Masiixu ha idiinku jiro si badan xagga xigmadda oo dhan, idinkoo wax isbaraya oo isku waaninaya sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa, idinkoo Ilaah ugu gabyaya nimcada qalbiyadiinna ku jirta."* (Kolosay 3:16).

Qodobkani waa qodob xambaaran koritaanka Masiixiyiyiinta inay ku xiran tahay oo ay udub dhexaadkeeduna tahay wacyigelinta iyo caabudaadda, xagga barshada iyo fahmidda faahfaahintiisa. Aragtida gaaban ee dadyowga casrigan ee ay ka qabaan xagga wacdinta ma odhan karno waa wax ku kooban ilaa iyo toban daqiiqadood keliya oo aan ka heleyno marka aan dhegeysanno runta. Wacdiga kitaabiga ah wuxuu wax inoogu sheegaa si shakhsiyan ah,

markaasaan caabudnaa oo aan la wada wadaagnaa cashada Rabbiga Isaga iyo kuwa rumeysanba. Bal eeg Ereyga Ilaah sida ku cad: "*Illinjoogaha ayaa isaga illinka ka fura, iduhuna codkiisay maqlaan, idihiisana magacyadooda ayuu ugu yeedhaa, oo dibadduu u kaxeeyaa. 4 Markuu kuwiisa wada saaro, wuu hor kacaa, iduhuna way raacaan, waayo, codkiisay garanayaan. Waxaan ahay adhijirka wanaagsan; waan garanayaa kuwayga, kuwayguna waa i garanayaan,"* (Yooxanaa10:3-4, 14).

Mararka qaar, soddon daqiiqadood oo lagu sharxo qoraal kooban oo kitaabi ah waxay u muuqan kartaa wakhti muddo yar oo la wacdiyey. Dheeysiga wacdintaa haddii aysan ku qumanayn Ereyga Ilaah iyo doonista Ilaah waxba inooma aha. Bal eeg sida ku cad aayadaha:
*"Qorniin kastaa wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda, iyo canaanashada, iyo hagaajinta, iyo edbinta xagga xaqnimada; in ninka Ilaah u ahaado middhan oo aad loogu diyaariyey shuqul kasta oo wanaagsan. Waxaan kugu amrayaa Ilaah hortiis iyo Ciise Masiix oo xukumi doona kuwa nool iyo kuwii dhintayba hortiisa, oo waxaan kaloo kugu amrayaa muuqashadiisa iyo boqortooyadiisa, inaad hadalka dadka ku wacdido. Wakhti*

*wanaagsan iyo wakhti xunba ku dadaal, oo canaano, oo hagaaji, oo waani, adigoo dulqaadanaya oo wax baraya.*” (2 Timoteyos 3:16-4:2).

Waa wax aan la jeclaan karin inaan sidaa ku korno saameynteeda.

**AQOONTA**

Ahaanshaha Masiixi micnaheedu waxaa weeye yeelasho nolol xagga gudaha ah.

*“Laakiin wuu u jawaabay, oo ku yidhi, Kii i bogsiiyey ayaa igu yidhi, Sariirtaada qaado oo soco.”* (Yooxana 5:11).

Taasoo u sahashay garashada aqoonta Ilaah iyo Ciise Masiix. “*Tanu waa nolosha weligeed ah inay ku gartaan. adoo ah llaaha runta ah oo keliya iyo inay gartaan Ciise Masiix, kii aad soo dirtay.”* (Yooxanaa 17:3). Sababta oo ah aqoontan waa mid ku jirta dabeecadda shakhsiyadeed ee asaasiga inoo ah inaan ku korno nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyaheenna Ciise Masiix. Isagu ammaani ha u ahaato haatan iyo weligeedba. Aamiin. Sidaas oo kale si la mid ah ayuu Rasuul Bawlos aaminsanaa in kortaankaa yahay aqoonta asaasiga u ah ay sameyso udubka dhexe ee baryadeenna ku

aadan kuwiisa Masiixiyiinta ah inuu Ilaahay ku dhowro Ayaan mar walbaba weyddiisanaa Rabbiga inuu muunaddiisa ama xurmadiisa ku siiyo xigmadda ruuxa, iyo muujintiisa deedna aad u ku garato si wanaagsan Isaga waa Ilaahiye! Waliba waxaan kaloo Ilaah ka baryaa oo aan salaadda ku weyddiistaa inuu indhaha qalbigaaga u iftiimiyo oo uu u furo si aad u garato rajada uu kuugu yeedhay adigu hodantinimada xurmaddiisa inay u dhaxlaan xertiisa, oo ay inooga buuxsanto xoogga weyn kuwa rumaystay hadii aan nahay. Ereyga Rabbiga ee Qudduuska ahna waxaa ku qoran sidatan: " *in Ilaaha Rabbigeenna Ciise Masiix oo ah Aabbaha ammaanta uu ruuxa xigmadda iyo muujinta idinku siiyo aqoonta aad isaga taqaaniin.Oo waxaan Ilaah baryayaa in indhaha qalbigiinna la nuuriyo, si aad u ogaataan waxa ay tahay rajada yeedhistiisu, iyo waxa ay tahay hodantinimada ammaanta dhaxalkiisa ee ku jirta qoduu siinta, iyo waxa ay tahay weynaanta xooggiisa aan la koobi Karin oo uu u hayo kuweenna rumaysan, sida uu u shaqeeyo xoogga itaalkiisa"* (Efesos 1:17-19).

Weliba waxaa kale oo taasi sii daba socota qoraale kale oo ay ka mid yihiin aayadahan:

"*Waayo, waxaan ogahay in taasu badbaado ay iigu noqonayso xagga ducadiinna iyo caawimaadda Ruuxa Ciise Masiix*," (Filiboy 1:19).

Waxaa weliba sii xoojinaysa aayad kale oo ina leh: "*Sababtaas daraaddeed tan iyo maalintii aannu taas maqalnay ma aannu joojin inaannu idiin soo ducayno. Waxaannu Ilaah idiin baryaynaa inay idinka buuxsanto aqoonta doonistiisa xagga xigmadda iyo waxgarashada Ruuxa oo dhan,"* (Kolosay 1:9).

Side baa haddaba koriinka iyo aqoonta meel u wada galaan? Sida ay tahay fahmiddeenna oo ku sii koreysa waaya aragnimadeena waa waxa uu ina barayo qoraalka Kitaabka Quduuska inuu inoo yahay qayb ka mid ah udub dhexaadka edbinteenna shakhsi ahaanayd.waxaa jira waddo aan ku heli karno oo ku dul ahaatay lahaanshaha kaniisadeed oo aad ka mid tahay urukaa, meeshaasna ayaa ah meesha si waadax ah looga heli karo waxbarashada Ereyga Ereyga Kitaabka Qudduuska lagu barto, lagana heli karo aqoonta wanaagsan eek u jirta cilmiga Kitaabka Quduuska, iyo fahmidda dabeecadaha Ilaah iyo waddooyinka maskaxdiisa fikaddeeda oo buuxda. Haddii aan daacad ka nahay waxyaalaha ku saabsan koritaanka Masiixiyada, ka masiixi ahaa waa inaan u arkin farriimaha Ilaah ee ku qoran Kitaabka Quduuska inay

yihiin aqoon ama wax aan ka fiirsaho lahayn oo iska micnon darra ah – waayo Kitaabka Quduuska waa Ereyga Ilaah ee nool. Waa in aan isku barbaarino aqoonta jidkeeda. Middani waa talo yar:-

In kasta uu inagu socdo wakhti wuxuu qaadan karaa inta noloshaada ka hartay oo idil. U akhri si waasac ah balaaran, oo u akhri si qoto dheer, laga yaabee inaadan si wanaagsan u aqoon Kitaabka Quduuska. Kuna ogow akhrintaa qaybihiisa balaara, akhri kutubka Axdiga Hore markaad fadhido, oo durba fiidkii gogosha u gal oo akhri intii ka soo bilaabanta Bilowgii, oo wakhtiyada duhuradii saacadaha qadada ku dadaal inaad akhriso qaybha Axdiga Cusub, gaar ahaan warqadahii rasuul Bawlos oo ku siman laba toddobaad oo aad joogteeso inaad akhrido, Injiilka qaybihiisana caadayso inaad akhriso galinada dambe ee maalmaha Axadda ugu yaraan muddo ku siman hal bil. U akhri kutubada Falimaha Rasuulada iyo Muujinta si kala go’ aan lahayn maalmaha Sabtida ilaa muddo Iyana. Oo yeello saxiib kula akhrista haddii aad karayso oo si cod dheer leh u wada akhrista midkiinba midka kale kolkiisa ha u dhageysto, muddo bil gudhaeeda ahna waad akhrin kartaa Kitaabka Qudduuska qaybtiisa Axdiga Cusub. Sidaa si la mid ah uma adka inaad u qorshaysato inaad ku akhriso qaybta Axdigii

hore. Taasina inyar bay kuugu qaadanaysaa inaad isnidaamisid, waadna la yaabi doonta sida aadka ah ee aad durbadiiba u baratay akhrintaasi balaaran.

**U akhri si qotodheer**:- Waagaan caruurta ahaa ee aan yaraa, waxaan aad uga heli jiray sida ay dadka waaweyn jiilkii ayayooyinkeennii sidii ay u nuugi jireen nacnaca laga sameeyo caleenta udgoon oo muddo badan la ruugi jiray, hlka xiligan aan ku jirno ay tahay kol un la ruugo oo lagu liqo muddo yar dhexdeeda in ka yar hal daqiiqad keliya. Awoodda nuugidda mudda dheer waa calaamad weyn oo xagga qaangaaridda!

Ruugidda, calaajinta iyo liqidda waxay aniga ii tahay wax muhiim ah inta aan xusuusan lahaa dhadhanka iyo u bogidda. Koritaanka Masiixiyadda waa wax ku waajibay, taas oo kale in lagu barto nuugidda qoraalka iyadoo loogu dulqaadanayo barashadiisa iyo ka fiirsashadiisaba. Qorniin kastaa wuxuu "*ku ahaaday Ruuxa Ilaah*" (2 Timoteyos 3:16). Laakiin sida runta ah qayb ka mid ah si degdeg aha ayay qalbiyadeenna ugu muujinayaan kay ku ahaatay oo Ilaah qudhiisa ah. Laga yaabe inay ku caawiso, tusaale ahaan, markaad wakhtiyada u gaar ah maalmahaada aad siiso akhrintiisa muddo bil ah oo aad qayb qayb u dhexmarto Kitaabka Qudduuska oo aad wax ka barato sida kutubadan qaar ka mid ah sida: Bilowgii, Baxniintii,

Markos iyo Yooxanaa, Sabuurrada iyo Maahmaahyada, Falimaha Rasuuslada iyo Rooma. Ilaa inta aad ka faa'ideysan doonto inaad hesho macalin ama barayasal kuu faahfaahiya oo ku maangashto ugu yaraan mid ama laba bare. Aad bay u wanaagsan tahay inaad heshid kutubada sharaxa tafsiirka Kitaabka Qudduuska oo la hubo waxbarridooda inay waafaqsan tahay waxbaridda Kitaabiga ah ee Ereyga Ilaah. Weligaana kama qoomamaeyn dooontid taa iyada ah. Waxaa jira oo kale weliba buugaag ay qoreen qaar ka mid ah walaalaha Masiixiyiinta oo aad ka heli karto wax badan oo caawimaad ah.

Haddaba inaga oo og intaas oo idil ka dib fahmidda jacaylka mucjisada ah ee Masiixa wadajirka dhamaan rumaystayaasha qudduusiinta ah. Oo waliba uu ku dul dhiso mid walbaba sida ay tahay haddiyadda uu leeyahay iyo fahmiddeeda *[Inaad jacey xidid iyo aasaas ku yeelataan iyo inaad ugu xoogeysataan si aad qudduusiinta oo idil ula garataan waxa ay yihiin balaadhka iyo dhererka iyo kor u dheeridda iyo hoos u dheeridda] [ laakiinse inaga oo si jaceyl ah runta ugu hadlayna aynu wax walba ku korno xaggiisa, kan madaxa ah oo ah Masiix. Kaas oo jidhka oo dhammu si wanaagsan isugu heysta oo isugu wada xidhan yahay caawimaadda xubin*

*kastaba keento sida xubin kastaaba u shaqayso qiyaasteeda oo ugu kordhiso jidhka inuu jaceyl ku dhismo]* (Efesos 3:18, 4:14-16).

Waxa jira jarribaadyo waaweyn oo aad mooddo saameyn weyn inay ku leedahay qaabanta akhrinteeda inta badan ay ku soo korortay waayahayn dambe goobaha ganacsiga ee lagu iiniyo buugaagta la akhristo, oo keentay ugu dambeyntii kala qaybsnaan baaxad weyn leh oo ka dhex abuurantay dunida Masiixiyiinta dhexdooda. Ka taxadar am aka digtoonow. Waa wax aad muhiim kuugu ah oo kuu wanaagsan xulato deedna aa akhrisato inta yare ee buugaagta masiixiyiinta ah ee tayada leh, lana hubsaday qiimahooda waxtarnimo, inta aysan ku soo dhexgelin ama kugu qasmin ruuxyada mulxidnimo ee aaminsan inuusan Ilaahaba jirin. (Athenian spirit) waxa loogu yaqanno afka qalaad oo markeedii horeba jiray – (cawaanimada). Bal eeg aa ama maqlaan wax cusub mooyaane, aayadahan ku qoran Kitaabka Qudduuska ee ka hadlay arrintan:- " *Haddaba reer Ateenay oo dhami iyo dadkii qalaad oo halkaas deggenaa, wakhtigoodii wax kale kuma ay dhaafin iney sheegaan* " (Fallimaha rasuulada 17:21).

Waxaad tahay xerta Ciise Masiix. "Xernimo" waxay ka timid erey luqadda laatiinka ah "Disciphlus" oo la micne ah

talmiid/arday ama dugsiley – adiguna waxaad ku jirtaa dugsiga Masiix ee si wanagsan wax u baro!

## MARKHAATIFURKA IYO ADEEGGA.

Dareenkeennii ka fiirsasha la'aaneyd ayaa ahaa kii ka bani'aadnimo aynu ku dhacnay kolkeedii horeba ee meel laynoogu dhigay diiwaankeeda. Laakinse Ciise Masiix waxa uu yidhi tani waa waddada geerida/dhimashada, nonlona ma aha:- "*Waayo, kan doonaya inuu naftiisa badbaadiyo, waa lumen doonnaa, laakiinse, kan naftiisa u lumiya aawaday, kaasaa badbaadi doona*." Macaashkeena iyo koriddeena waxay ku jirtaa nolosha masiixiyadda ee Masiixa siiyey nolosheena iyo kuwa kaleba. Taas bayna ahayd tii uu Rasuul Bawlos inoo soo bandhigay ee aadka u xanuun badnayd:- " *Sidaas daraadeed, annaga dhimashda way inaga dhex shaqaysaa, laakiinse, noloshu idinkay idinka dhex shaqaysaa*." (2 Korintos 4:12).

Middani waa markhaatifurka qalbiga masiixiga. Laga yaabaa inaan si weyn u darreenno kana xishoonno waxyaalaha ku saabsan markhaatifuridda dadka kale inaan la qaybsanno masiixiyadda sidii horeba ugu dhacday Timoteyos oo

wakhtigeedii u suuragashay inuu dhiirigelin ka helo Rasuul Bawlos: - "*Sidaas daraadeed ha ka xishoon u – markhaatifuridda Rabbigeenna ama aniga oo Isaga maxbuus u ah, laakiinse dhibaatada Injiilka kaga qayb qaado xoogga Ilaah*." (2 Timoteyos 1:8).

Laakiin marka aan soo qaadano markhaatifuridda Masiixa waxaan ka heleynaa ama inoo soo baxaya intaan ka jarayn/gariiri lahayn (cabsi awgeed) inaan ku korno nimcada Rabbiga ee Imjiilka fahmiddeeda inta badan way inna xoogeysaa, sababta oo ah waxaannu awood u yeelanaynaa qof kale inaan u sharaxno; farxaddeena iiyo caymiska inoo siyaaday. Sabata oo ah waxaan si buuxda aan u galnay xeendaabka adeecidda Masiix. (Si sahlanna uma iloobi doono sidii kuray barbaar ah inaan uga booday waddadii aan ku socday anoo si farxad leh u raacay wakhtigii iigu horreysay inaan la hadlay sidii badbaadiyaheega cusub oo kale). Xitaa haddii markhaatifurkeenna ku gacan sayrid diidmo ay ahayd, Masiix waxa uu ina siiyey ballan qaadkiisii ahaa waxaa barakadaysan kuwa ii yimaada. Sida ku cad Kitaabka Qudduuska qaybtiisa Axdiga Cusub, Injiilka sida Luukos u qoray: "*Guri alla gurigaad gashaan, horta waxaad ku tidhaahdaan, Gurigan nabad ha u ahaato. Ina nabdeed*

*hadduu halkaas joogo, nabaddiinnu waxay ahaan doontaa dushiisa, haddalese way idinku soo noqon doontaa.*" (Luukos 10:5-6). Laakiinse, markhaatifurkeena Masiixa ama aha wax ku xiran ama ku xaddidan ereyada aan ku hadlayno keliya; waa wax khuseeya wax walba oo aan nahay iyo waxqabadkeenaba ku xiran, gaar ahaan sida aannu ugu adeegno dadka kale. Halkan waxaan ku taabanay oo aan dul-istaagnay gunta nuxurka qaab beddeliddii Masiixa uu u beddelay nolosheena. Isaga qudhiisa waxa uu u yimid sidii adeege u adeega dadweynaha.

Bal akhri aayadahan: - " *Sida Wiilka Aadanahu uusan ugu iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa dad badan furashadooda u bixiyo"* (Matayos 20:28) ; " *Isagu wuxuu lahaa suuradda Ilaah, oo inuu Ilaah la mid ahaado kuma uu tirin in taasu tahay boobis, laakiinse wuu ismadhiyey, oo wuxuu qaatay addoon suuraddiis, oo wuxuu noqday mid dad u eg,"* (Filiboy 2:6-7). Si la mid ah sidii uu yidhi Rasuul Bawlos, waxaynu nahay addoomadiisa *"Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah addoonkii Ciise Masiix, oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, oo gooni looga dhigay injiilka Ilaah"* (Rooma 1:1).

Deedna sidaas daraadeed, Isaga awgii. Waxaa inagu waajibay inaan noqono addoomadiisii ahaa kuwa aannu garanayno oo la kulmaya. Waxaa inagu waajob ah inaan wax ka barano Bawlos siduu yidhi oo kale, ‘ Annaga qudhaydu idinkuma wacdino wax naga saabsan, laakiins, waxaan idinku wacdinaa wax ku saabsan Ciise MAsiixa oo Rabbiga ah, iyo annaga oo ah addoomadinna Ciise aawadiis’ far ku fiiqidda Bawlos waa kor u korutaanka masiixiyiinta oo la micne ah u adeegidda kuwa kale oo ah waddo ka mid ah wadiiqooyinka ay dadku ku arki karaan inaan leenahay isaga oo inagu dhaqaajinayo u adeegidda dadka kale, maxaa wacay, waannu aaminsanahay oo weliba waan jecelnahay Isaga. Haddii aan u adeegin dadka kale, si aad u wacan uguma kori karno xagga u-ekaanshaha Masiixa; oo haddii aan aad ugu kori weyno u-ekaanshaha Masiixa …… Ma koreyno. Waa maxay waxa ay ku lug leedahay adeegidda? Waxay la micne tahay oo lagu fasiri karaa qeexiddeeduna tahay barashada Alla u bariga kuwa kale ama dadka kale loo baryo Ilaah (U duceynta dadka kale), la siiyo wakhti loogu duceeyo iyaga, una isticmaalno awoodda haybaddeenna iyo habeynta maalgelinteenna xagga Alle sida ku quman arrimahan aan ugu deeqeyno ka qayb ahaanta dabeecadaha ku aadan Masiixa. Ku dhaqan nololeedka noocan ah, waa mid ka mid ah barakada buuxda ee samata bixinta laga

samata bixinayo danaeysiga naf jaceylka gaar ahaanayed ee xiligan manta aan ku jirno iyo hellidda adeegga Masiixa ee xorta ah qayaxan ah. In wax la helo waxaa ka barka badan in wax la bixiyo – sida ku qoran Kitaabka Qudduuska, qaybtiisa Axdiga Cusub: " *Wax walba waan idin tusay si ay waajib idiinku tahay, idinkoo sidaas oo kale u haw- shoonaya, inaad caawisaan kuwa itaalka yar, oo aad xusuusataan hadalladii Rabbi Ciise siduu isaga qudhiisu yidhi, In wax la helo, waxaa ka barako badan in wax la bixiyo.* " (Falimah Rasuullada 20: 35). Ma heshay in kuugu filan oo aad ugu laylido/ ku isticmaasho ama ku jimicsato noocan si la mid ah?

BEEYADDA:-

Ilaalinteeda, isku hagaakinteeda wanaagsan, nidaam la jeclaado guri leh wuxuu noqon karaa meesha ugu wanaagsan oo ay suuragalka u ah ee ay ka bilaabanayso nolosha haysashada inaan leenahay waalidiin ina korisa oo ina barbaarisa inaga iyo walaalo wiilal iyo gabdho isgu jira oo inala wadaaga koriimahayaga, waayo wehelnimadu wadajireed waa mid ka mid ah waxyaalaha qiimaha sare u leh nolosha bani-aadanka. Wax aan la yaabnana ma aha in aan sidaa oo

kale Kaniisadda (Ururuka Rumeystayaasha in ay Beeyadda aan ku jirno ee aan ku koreyno sida caruurta Ruuxa). Waxay ka dhex muuqatay oo lagu arkaa Kitaabka Quduuska, qaybtiisa Axdiga Cusub sida hal qoys oo kale inay yihiin masiixiyiinta. Ciise Masiix qudhuusa sidaa ayuu ahaa fikirkiisii iyo dhaqankiisii markii laga eego inay wadiiqadu sidaa tahay, kolkaad u eegto xertiisii, kuwii ay u ahaatay doonista Ilaah Isaga sidii inay u noqdaan wiila iyo gabdho walaale la ah iyo hooyaba; Taas baynu u ahayd Isaga sidii qoyskiisa. "*Ku alla kii yeelaa doonistii Ilaah, kaasaa walaalkey iyo walashey iyo hooyadey!"* (Markos 3:35), kaniisaddu (Ururka Macbudka Rumeystayaasha) qof walba oo ka mid ah waa xubin ka tirsan reerka/qoyska Rumeystayaasha!). Bal eeg aayadahan:- *"Sidaas daraaddeed markaynu wakhtiga haysanno, kulli aan wanaag u samayno, khusuusan dadka rumaysadka leh. Dhammaadka"* (Galatiya 6:10); *"Sidaas daraaddeed idinku mar dambe ma ihidin ajanabiyo iyo shisheeyayaal. Laakiinse qoduusiintaad isku waddantihiin, oo waxaad ka mid tihiin reerka Ilaah,"* (Efesos 2:19). Qoyska ama reerka Ilaah. Halkana waxaa yaala qaynuunka dahabiga ah ee wadaaga jecaylka loo wada siman yahay: *"Kanu waa qaynuunkayga inaad isjeclaataan sidaan idiin jeclaaday."; "Waxyaalahaas ayaan idiinku amray inaad isjeclaataan."* (Yooxanaa 15:12, 17), "*Ninna yuusan wax*

*idinku lahaan in midkiinba midka kale jeclaado mooyaane. Waayo, kii deriskiisa jeclaadaa sharcigu oofiyey."* (Rooma 13:8);

*"Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa, oo uu nafsadiisii inoogu bixiyey inuu Ilaah u ahaado qurbaan iyo allabari oo u ahaado caraf udgoon"* (Efesos 5:2). *"Laakiinse xagga jacaylka walaalaha loo qabo uma aad baahnidin in wax laydiin soo qoro, maxaa yeelay, idinka qudhiin-naba Ilaah baa idin baray in midkiinba midka kale jeclaado."* (1 Tesaloniika 4:9). *"Sidaad naftiinna u daahiri-seen markaad addeecdeen runta xagga jacaylka walaalnimada oo aan iska yeelyeel ahayn, aad iyo aad qalbiga isaga jeclaada."* (1 Butros 1:22), "*Oo kanu waa warkii aad tan iyo bilowgii maqlayseen, kaasoo ah inaynu isjeclaanno, oo aynaan ahaanin sida Qaabiil oo ahaa kan sharka leh oo walaalkii dilay. Oo muxuu u dilay? Waayo. Shuqulladiisu waxay ahaayeen shar, oo kuwii walaalkiisna xaq bay ahaayeen. Walaalayaalow, ha la yaabina haddii ay dunidu idin neceb tahay. Waxaynu og nahay inaynu dhimashada ka soo gudubnay oo aynu u soo gudubnay nolosha, maxaa yeelay, walaalaha ayaynu jecel nahay. Oo ka aan walaalkii jeclayn. dhimashaduu ku sii hadhaa. Ku alla kii walaalkii neceb waa dhiigqabe, oo idinkuna waad og tihiin*

*inaanu dhiigqabena lahayn nolosha weligeed ah oo ku sii jiraysa. Taasaynu jacaylka ku garanaynaa, waayo, isagu naftiisuu u bixiyey aawadeen; oo innaguna waa inaynu nafteenna u bixinno walaalaheen. Laakiin kan leh xoolaha dunidan, oo arka walaalkiis oo baahan, oo qalbigiisa ka xidha, sidee baa jacaylka Ilaah ugu jiraa isaga? Carruurtaydiiyey, yaynaan ku jeclaanin hadalka iyo afka toona, laakiin camalka iyo runta aan ku jeclaanno. Oo taasaynu ku garan doonnaa inaynu kuwa runta nahay, oo aynu isaga hortiisa qalbigeenna kaga dhiiro gelin doonnaa xagga wax alla wixii qalbigeennu inagu eedeeyo, maxaa yeelay, Ilaah waa ka weyn yahay qalbigeenna, oo wax walbaba wuu og yahay. Gacaliyayaalow, haddii aan qalbigeennu ina eedayn, kalsoonaan ayaynu ku leennahay xagga Ilaah. Oo wax kastoo aynu ka barinno waynu ka helnaa, maxaa yeelay, qaynuunnadiisa ayaynu xajinnaa, oo waxaynu falnaa waxa Isaga ka farxiya. Oo kanu waa qaynuunkiisa, kaasoo ah inaynu rumaysanno magaca Wiilkiisa Ciise Masiix ah, oo aynu isjeclaanno, siduu qaynuunka inoo siiyey"* (1 Yooxanaa 3:11 -23); *"Gacaliyayaalow, aynu isjeclaanno; waayo, Ilaah baa leh jacaylka; oo mid walba oo jecel, wuxuu ka dhashay Ilaah, Ilaah buuna yaqaan. Oo ka aan jeclaynina Ilaah ma yaqaan; waayo, Ilaah waa jacayl. Ilaah baa Wiilkiisa keliya oo dhashay dunida u soo diray si aynu*

*ugu noolaanno isaga, oo taasaa jacaylka Ilaah laynoogu muujiyey. Oo taas jacayl baa ku jira, mana aha inaynu Ilaah jeclayn, laakiinse isagaa ina jeclaaday, oo wuxuu Wiilkiisa u soo diray si uu kafaarogudka dembiyadeenna u noqdo. Gacaliyayaalow, haddii Ilaah sidaa inoo jeclaaday, waa inaynu isjeclaanno. Cidina Ilaah ma arkin marnaba. Haddii aynu isjeclaanno, Ilaah wuu inagu jiraa, oo jacaylkiisu wuu inagu dhan yahay."* (1 Yooxanaa 4:7-12).

Maxaa ka dhex socda beeyadan jacelka ah? Sidee bayse nolosha ka jirta qoyska Ilaah dhexdeeda saameyn inoogu yeelan kartaa oo deedna ay u dhiirigelisaa koritaankeena ruuxiyadda ah?

Hal shay dartii, kuwa kale ee inoo adeega sida waafaqsan hadba haddiyadaha uu Rabbiga siiyey iyagu. Waxaa jira haddiyado kala duwan oo fara badan ruuxi ah oo ku dhexjira Kaniisadda oo aan si toos ah uga heleyno dhiirrigelin, tilmaamid iyo hagid xigmadaysan. Bal eeg aayadahan:
*"Waayo, sida aynu xubno badan ugu leennahay jidhkeenna, oo aan xubnaha oo dhammuna isku shuqul u ahayn, sidaas oo kalaan, innagoo badan, Masiixa isku jidh ku nahay, oo midba midka kale waa xubnihiisii. Innagoo haysanna hadiyado ku kala duwan nimcadii layna siiyey, hadday tahay wax sii*

*sheegid, aan wax ku sii sheegno sida qaybta rumaysadkeenna. Ama hadday tahay adeegid, aan aad u adeegno; kii wax baraana, si fiican wax ha u baro; kii wax waaniyaana, si fiican wax ha u waaniyo; kii wax bixiyaana, deeqsinimo wax ha u bixiyo; kii wax u taliyaana."* (Rooma 12: 4-8). "*Waxaa jira hadiyado kala cayn ah, laakiin waa isku Ruux. Waxaana jira adeegid kala cayn ah, waana isku Rabbi. Wa-xaana jira shuqullo kala cayn ah, laakiin waa isku Ilaah, kan dham-maan wax walba kaga dhex shaqeeya. Laakiin mid kasta waxaa muujinta Ruuxa loo siiyaa waxtar*." (1 Korintos 12:4-7 ). "*Oo qaar wuxuu ka dhigay inay ahaadaan rasuullo. qaarna nebiyo, qaarna wacdiyayaal. qaarna kuwo kiniisadda dhaqaaleeya, iyo macallimmo.*" ( Efesos 4:11 ). "*Haddaba wax walba dhammaadkoodu wuu dhow yahay,*

*Sidaas daraaddeed digtoonaada, oo tukashada u feeyignaada. Wax walba hortood idinku aad isu jeclaada, maxaa yeelay, jacaylku wuxuu qariyaa dembiyo faro badan. Is-marti-gunuunac la'aan. Sida mid waluba u helay hadiyad, idinkuisu adeega, sida wakiillo wanaagsan oo helay nimcada Ilaah ee badan ee kala cayncaynka ah. Haddii nin hadlo, ha u hadlo sidii isagoo ku hadlaya hadalka Ilaah; haddii nin adeegona, ha u adeego siduu Ilaah xoogga u siiyo, in wax walbaba Ilaah ku ammaanmo Ciise Masiix, kaasoo weligiis iyo weligiisba leh*

*ammaanta iyo dowladnimadaba. Aamiin. Masiixiyiintu waa inay ku farxaan xanuunka ay Masiixa u xanuunsadaan*" (1 Butros 4:7-11).

Laakiinse, dhamaantood waxay leeyihiin hal ujeeddo arigtideeda oo ah inay sare inoo dhisto. "*kaas oo jidhka oo dhammu si wanaagsan isugu haysto oo isugu wada xidhan yahay caawimaadda xubin kastaaba keento sida xubin kastaaba u shaqayso qiyaasteeda oo ugu kordhiso jidhka inuu jacayl ku dhismo.*" (Efeso 4:16). Haddii aan ku fikirno inaynaan u baahnayn dadka kale (Gaar ahaan qaarkood) waxaynu noqonaynaa kuwa ku barara xanuun dartiis oo kibirsan, bilaababana inay quudhsadaan xigmadda Masiixa; dib baannu ugu noqonaynaa intii ay ahayd inaan korno. Weliba Kaniisadda dhexdeeda waaxaan ka heli karnaa hab ku dayasho mudan oo aan u raaci karno horumarrinteenna masiixinimo. Xubnaha qoyska Ilaah ee la nimceeyey iyo khibraddooda u fiirsahadeed ayaa ah waddooyinka Ilaah ee la jirta caruurtiisa. Rasuu Bawlos waxay ula muuqatay oo ay u ahayd muhiimadda dareen tagay middan oo ku jirtay saaxiibkiisii dhalinyarada ahaa Timoteyos. Wuxuuna u qoray warqad dhiirrigelineysa isaga, inuu ku sii socdo hab nololeedkiisii adeega: "*Laakiinse adigu waxaad raacday waxbariddayda, iyo socodkayga, iyo qasdigayga, iyo rumaysadkayga, iyo dul-qaadashadayda, iyo*

*jacaylkayga, iyo samirkayga, iyo silecyadayda, iyo xanuunsigayga. Waxyaalihii xunxumaa ee igu dhacay markaan Antiyokh iyo Ikoniyon iyo Lustra joogay! Silecyadii badnaa ee aan u adkaystay! Oo kulligood Rabbigaa iga samata bixiyey. Runtii, kulli inta doonaysa inay si cibaado leh Ciise Masiix ugu noolaadaan waa la silcin doonaa. Laakiinse dadka sharka leh iyo khaa'innadu aad iyo aad bay u sii xumaan doonaan, iyagoo wax khiyaaneeya, lana khiyaaneeyo. Laa-kiinse adigu ku sii soco waxyaalihii aad baratay oo aad hubsatay, adigoo garanaya kuwii aad ka baratay*"

(2 Timoteyos 3:10-14). Timoteyos jeedsashadiisa gudaha waxay ahayd inuu u ahaado masala kuwa rumeystay ugu noqdo xagga hadalka, xagga dabeecadda nolosha, xagga jacaylka

Iyo rumaysadkaba, iyo xagga daahirsanaanta ….. oo waxyaalahaa ku dadaal; oo nafsaddaada oo dhan u go' in horumarkaaga dadka oo dhan u muuqdo. "*Waxaan ku mahad naqayaa kan xoogga i siiyey oo ah Rabbigeenna Ciise Masiix, waayo, wuxuu igu tiriyey mid aamin ah intuu hawshiisa ii doortay, in kastoo aan hore u ahaan jiray mid dadka caaya oo silciya, oo dhiba, laakiin waa la ii naxariistay, waayo, aqoonla'aan baan ku sameeyey, anigoo aan rumaysanayn.*

*Nimcada Rabbigeenna waxay aad iyo aad ula badatay rumaysadka iyo jacaylka ku jira Ciise Masiix. Hadalkanu waa run, waana mid istaahila in la wada aqbalo, in Ciise Masiix dunida u yimid inuu badbaadiyo dembiilayaasha anoo ah kan ugu daran. Laakiin sababtaas daraaddeed waa la ii naxariistay in, anigoo ah kan ugu daran, Ciise Masiix iga muujiyo dulqaadashadiisa oo dhan, inaan masaal u noqdo kuwa hadda dabadeed isaga rumaysan doona inay nolol weligeed ah helaan.*" (Timoteyos 1:12-16). Waad aragtaa sow ma aha tusmadan tusaalaheeda ku dayashada mudan? Bawlos wuxuu u noqday Timatiyos tusaale ku dayasho mudan, kumana koobna keliya dulucda waxbariddiisii, laakiinse dabeecaddii noloshiisii, gaar ahaan silicyadii loo geystay iyo sidii Rabiga uga samata bixiyey oo u badbaadiyey kuna sii dhawray/ilaaliyey awooddii lagu sifeeyey/sharxay waayihii noloshiisii waa Bawlos'e.Timatiyosna wuxuu u noqday Maiixiyiintii kale tusaale wacan oo ku dayasho mudan. Haddaba golaha ururka Rumeystayaasha (Kaniisadda) ahna rumaysadka qoyska ay kawada tirsan yihiin, waxaynu ku eegnaa rumaysatayaasha kale iyo baryo (Rabbiyow ka dhex shaqee kuwaaana si la mid ah nimcooyinkaa u ahaatay nolosheeda/nafsadeyda) ama "Rabbiyow adigay kuu ahaatay adkeynteeda cajibka ah jawi

kastoo dhibaateysan oo ay ku jiraan xajinteeda, waadna awooddaa inaad anigana sidaa si la mid ah iga dhigtid" Waa beeyadda deegaameyd ay tahay inaan ku korno, sida ay doontaba ha ahaatee, ma aha sida halbeeg/cutub qoyseed keliyaata. Xitaa waxey waliba khuseysaa inta ka baxsan dunida. Halkan koriimada ku xusan mira dhalkeeda micno waxay ku timaaddaa deeqda Ilaah.

Ciise Masiix waxa uu yidhi "*Laan walba oo igu taal oo aan midho dhalin, wuu gooyaa, oo mid kasta oo midho dhasha ayuu nadiifiyaa si ay midho ka sii badan u dhasho."* (Yooxanaa15:2)

Kitaabka Qudduuska wuxuu ka hadlaa waxyaabaha ku saabsan hawlaha Ilaah iyo sida ay waxwalba "Wanaag" ugu wada shaqeeyaan kuwa Ilaah jecel. "*Oo waxaynu og nahay in wax waliba wanaag ugu wada shaqeeyaan kuwa Ilaah jecel xataa kuwa qasdigiisa loogu yeedhay.*" (Rooma 8:28). Laakiinse wanaagan muxuu yahay? Rumaystayaasha inay yihiin kuwa ku bedelamay cusboonaan ka kooban (oo la bedelay dibna loo hagaajiyey) inay haddana u ekaadaan suuradda Masiixa. " *Waayo, kuwuu horay u yiqiin wuxuu haddanau hore ugu doortay ekaadaan suuradda wiilkiisa, inuu Isaga curad u noqdo walaalo badan dhexdooda."* (Rooma 8:29)., dh

Sidaas oo ay tahay, dhamaan waayo-aragnimadiia iyo wixii soo maray nolosha waxay ahayd mid ku alagal qorsheysan oo niyad ku heyn ahayd, oo ku hoos jirtay gacanta xukunka Ilaah, inuu inaga caawiyo inaga inaan horey ugu korno yoolka weyn ee nolosha masiixiyiinta – u ekaanta Masiixa. Sida ku cad ama ka muuqato Bawlos raadraaciddiisii iyo dhibaatooyinkiisii, xanuunka iyo silacyadii soo maray, gaar ahaan (inkastoo aysan ahayn mid lala wadaagin) maskaxiyan. Sidee buu Ilaahay u isticmaalay inay inoogu suurta geliso inaan ku korno!!

(I) ***Ilaah wuu inagu tijaabiyaa***, taas oo wax inaga baraysa isku halaynt iyo ku kalsoonaanta noloshayada nimcadiisa. Bal ka fakir fursaddan markii xertiisii ay addeecday Ciise amarkii uu ku dejiyeye duufaantii badda ee ku kacsanayd badda Galilee, "*Maalintii qudheedii, goortii makhribkii la gaadhay, wuxuu iyaga ku yidhi, Dhanka kale aan u gudubnee. Goortay dadkii badnaa direen. Isagay wadeen intuu doonnidii ku jiray, oo doonniyo yaryar oo kalena way la jireen. Waxaa kacayduufaan weyn oo dabayl ah, hirarkiina doonniday ku dhaceen ilaa ay doonnidii buuxsamaysay. Isaguna wuxuu joogay xaggii dambe ee doonnida isagoo barkin ku hurda. Markaasay toosiyeen oo ku yidhaahdeen, Macallimow,*

*miyaanay waxba kula ahayn inaynu lunno? Kolkaasuu kacay oo dabayshii canaantay, oo badduu ku yidhi, Aamus oo xasil. Markaasaa dabayshii degtay oo xawaal weyn baa dhacday. Goortaa suu wuxuu iyaga ku yidhi, Maxaad sidaa ugu baqaysaan? Sidee baydnaan weli rumaysad u lahayn? Aad bay u baqeen, oo waxay isku yidhaahdeen, Haddaba yuu yahay kan xataa dabaysha iyo badduba yeelaan?*" (Markos 4: 35-41)

Qaar ka mid ahaa xertiisii ( Butros iyo Andriyo, Yacquub iyo Yooxanaa) wey ogaayeen ama garanayeen baddu inay la mid tahay sida xagga dambe ee gacmahooda. Waxaaana suurtagal iyaga u ahayd oo ay dareensanaayeen inay duufaani soo socoto. Dadaka badmaaxiyiinta ah wey uriyaan neecaawda waxyaalahaa oo kale ah, hadddana iyada oo ay sidaas tahay laga yaabee iney ka hor-imaadeen go'aankoodii shakhsi ahaayneyd inay la soo badheedhaan, weyse addeeceed Ciise, oo duufaantii bay la kulmeen. Addeecaddoodina waxay horseeday khatart!
(dhacdadan shileed waxay ina baraysaa inaysan ku khasbanayn inaan fikirno addeecidda inay u hoggaamiso ama u horseeddo nolol sahlan oo si fudud u helno, ama ay u ahaato inaan ku qiyaas qaadano markay waxyaalahan oo kale dhacaan mar walba inay calaamad u tahay caasinimadeenna ama addeecad

la'aanteenna inoo gaarka ah – waddooyinka Ilaah baa inala jira kuna jira nolosha masiixiyiinta, aalaaba way ka sii badan tahay ka shakisiin iyo cuqdad ta kaleba tan u ah! Laakiinse, waa maxay sababta uu Ciise sida cad uga baaraan degay inuu iyaga ugu hoggaamiyo dhibaatooyinka shiddada ah? Inuu raggan tuso ka ay u malaeynayaan inuu yahay, oo iyagu waliba ku qaan gaaray rumaysadkooda daciifnimada ruuxooda hoosta ugu sii fogaatay)
"*Goortaa suu wuxuu iyaga ku yidhi, Maxaad sidaa ugu baqaysaan? Sidee*
*baydnaan weli rumaysad u lahayn?*" (Markos 4: 40).

Oo dabadeed wuxuu si cad ugu muujiyey oo u tusay iyagii inuu yahay kan la isku halayn karo oo micno xaqiiqdii ka badbaadin kara xaalad walba oo ay ku jiraan. Duufaantii dhexdeeda wuxuu isugu muujiey iyaga ammaanta Ilaahnimo. Rumaysadkoodina wuu xoojiyey ama sii adkeeyey.

Waa dambe laga soo wareegay dhacdadaa sidii Sayidkiisii oo kale, Simon Butros ayaa isna sidiyoo kale hurdo la dhacay, si nabdoon xitaa inkasta oo ay nafsaddiisu ku jirtay xaalad adag oo dhibaataysan oo khatar weynna lahayd.

"*Haddaba wakhtigaas boqorkii Herodos ahaa ayuu wuxuu gacmihiisa u fidiyey inuu dhibo qaar ka mid ah kuwa kinii-sadda. Wuxuuna seef ku dilay Yacquub oo ahaa Yooxanaa walaalkiis. Oo markuu arkay inay ka farxisay Yuhuuddii. ayuu weliba ku daray inuu soo qabto Butros. Maalmahaasna waxay ahaayeen maalmihii lidda Kibista-aan-khamiirka lahayn. Oo kolkuu qabtayna, wuxuu ku riday xabsi, oo u dhiibay afar kooxood oo afar askari ah inay ilaaliyaan, isagoo doonaya inuu lidda Kormaridda dabadeed dadka u soo saaro. Sidaas darteed Butros xabsigaa lagu hayay; laakiin kiniisadda baa Ilaah aad iyo aad ugu bariday isaga. Oo markii Herodos damcay inuu soo saaro, isla habeenkaas Butros wuxuu kala dhex hurday laba askari isagoo ku xidhan laba silsiladood; waardiyayaalna albaabka hortiisa ayay xabsiga ka ilaalinayeen. Oo bal eega, malaa'igtii Rabbiga baa is-ag taagtay, oo iftiin baana xabsiga iftiimiyey. Markaasay Butros dhinaca ku dhufatay oo toosisay, oo waxay ku tidhi, Dhaqso u kac. Kolkaasaa silsiladihiina gacmihiisii ka dhaceen. Mar-kaasaa malaa'igtii waxay ku tidhi, Gunto oo kabahaaga xidho. Taas buuna yeelay. Markaasay waxay ku tidhi isagii, Dharkaagii huwo oo i soo raac. Markaasuu soo baxay oo raacay; ma uuna garanaynin in waxay malaa'igtu samaysay ay run tahay, laakiin wuxuu u maleeyey inuu riyo arkay. Oo*

*markay dhaafeen waardiyihii kowaad iyo kii labaad ayay waxay yimaadeen iriddii birta ahayd oo magaalada loo mari jiray; taas oo iyagii isaga furantay; markaasay ka baxeen oo waxay sii dhex mareen jid yar; markiiba malaa'igtii waa ka tagtay isagii. Oo markii Butros isgartay ayuu wuxuu yidhi, Imminka run ahaantii waan garanayaa in Rabbigu malaa'igtiisii soo diray oo iga bixiyey gacanta Herodos iyo wixii dadka Yuhuuddu filana-yeen oo dhan. Kolkuu waxaas ka fikiray, wuxuu yimid gurigii Maryan, oo ahayd hooyadii Yooxanaa oo Markos la odhan jiray; meeshaasoo dad badan ku urursanaayeen oo ku tukanayeen. Markuu albaabka iridda garaacayna, waxaa timid gabadh midiidin ah oo Roda la odhan jiray inay maqasho. Kolkay codkii Butros garatay, farxad darteed bay albaabka u furi weyday, laakiin gudaha bay ku orodday, wayna sheegtay in Butros iriddahor taagan yahay. Markaasay waxay ku yidhaahdeen iyadii, Waad waalan tahay. Laakiin way ku sii adkaysatay inay sidaa tahay. Iyaguse waxay yidhaahdeen, Waa malaa'igtiisii. Laa-kiin Butros waa sii garaacay, oo kolkay albaabka fureenna, way arkeen isagii, wayna yaabeen*." (Falimaha Rasuullada 12:1-16).

Sida uu Yacquub inagula talinayo si la mid ah "*Walaalahayow, kolkaad jirrabaaddo kala cayncayn ah kala kulantaan, kulli*

*farxad u tirsada, idinkoo og tijaabinta rumay-sadkiinnu inay dulqaadasho keento.Oo dulqaadashadu hadhammayso shuqulkeeda si aad kaamil u ahaataan oo aad u dhanaataan, oo aydnaan waxba ugu baahnaan."* (Warqaddii Yacquub 1:2-4).

Waa sida ay tahay tijaabintu sidaas daraadeed, waa u muhiim aasaaska korriimaha.

(II) ***Ilaah baa ina nadiifiya.*** Waa tusaale fiican, laakiinse waa wax sax ah oo aan khalad lahayn, qarnigii toddobo iyo tobnaad ayuu wadaad ka mid ahaa hoggaamiyayaashii waagaa jiray oo lagu magacaaabi jiray Pastor John Flavel ayaa ereyadan leh sidatan:- " waxyaabaha jirridda keenna ee sababa waxay leeyihiin isticmaal la mid ah oo ay ku soo dhamaato nafsaddeenna dhededa aadka u qabow ee u dul ahaatay kuwa lagu dul waray iyo dareeraha cad ee dharka caddeeyo markii la mayrayo midabkiisina bedesha iyada oo ka dhigta mid aad u cad"

Sidaas oo kalana Simon Butros ayaa horay u arkay oo u baray xertii kale: Jaribaaddu waa ta rumaysadka ku tijaabisa in lagu sifeeyo/nadiifiyo oo lagu caddeeyo oo waliba xoogeysa.

"*Idinku waxaad tihiin kuwo xoogga Ilaah iyo rumaysadka lagu dhawro ilaa badbaadada diyaarka u ah in wakhtiga ugu*

*dambaysta la muujiyo. Taas waad ku faraxsan tihiin in kastoo, haddii ay waajib tahay, aad haatan wakhti yar ku murugootaan jirrabaaddo badan oo kala cayncayn ah*.” (Warqaddii kowaad ee Butros 1:5-6).

Taasina waa mid ka mid ah casharada waaweyn eek u jira Sabuurrada 119: “*Intaan lay dhibin ka hor ayaan ambaday, Laakiinse haatan eraygaaga waan dhawraa. -- Waa ii wanaagsanayd in lay dhibo, Si aan qaynuunnadaada u barto. --- Rabbiyow, waan ogahay in xukummadaadu ay xaq yihiin, Iyo inaad aaminnimo igu dhibtay.”* (Sabuurrada 119:67, 71, 75).

Daawadu waxay u muuqan kartaa mid iska cad oo aan u sharaxaad dheeraad ah u baahnayn; laakiinse cudurku waa mid aad gun dheer hooseeyo.

Korriimada nimcada ku jirta suurtagal ma’aha ilaa cudurka faafiddiisa la joojiyo mooyaane oo la burburiyo saameyntiisa oo idil. Waa marka aad dareemayso inuu Ilaah si wacan oo habsan kuula macaamilyo. Xusuuso waxa uu kaa dhex samaynayo. “*Waayo, iyagu dhawr maalmood ayay inoo edbi-yeen sidii la wanaagsanayd, laakiin isagu wuxuu inoo edbiya si inoo faa'iido ah si aynu uga qayb galno qoduusnimadiisa. Edbinina wakhtiga la joogo uma eka mid lagu farxo, laakiin*

*waxay u eg tahay mid caloolxumo leh, laakiin dabadeedto waxay kuwii lagu edbiyey u dhashaa midho nabad iyo xaqnimo ah. Sidaas daraaddeed xoogeeya gacmaha taagta daran iyo jilbaha tabarta yar."* (Cibraaniyada 12:10-12). U ekaanta Masiixa ee kugu jirto ma'aha mid ku timid qiimo jaban oo raqiisa ah xagga Ilaah iyo adigaba.

***(III) Ilaah wuxuu inoogu diyaariyaa shuqulada adeegga***, waxayna kuna aadan tahay quudinta ku xeedhan nolosheenna. Haddaba haddii aan eegno Nabi Yuusuf soo jiidashadiisii shakhsiyeed

Xiliyadii hore ee noloshiisii. Ugu dambayntiinii noqotay mid la arkay sanado badan ka dib edbin iyo siin Rabbaani ah, oo walaalhiisii iibiyey si loo addoonsado ku yidhi waagii dambe "*Idinku xumaan baad ila damacsanaydeen, laakiinse Ilaah wuxuu damac-sanaa wanaag si uu u sameeyo siday maantaba tahay oo uu dad badan badbaadiyo."* (Bilowgii 50:20). Rasuul Bawlosna sidaasoo kale wuu ka hadlay wixii dhibaato iyo silic ee soo maray iyo siduu ugu diirsaday raaxaduu ka helay ee ay suurowday inuu u adeego kuwii kale ee la silcinayay iyagana xilligoodii. Bal eeg ereyadiisii: - "*Waxaa barako leh Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix, oo ah Aabbaha naxariista leh iyo Ilaaha gargaarka oo dhan, kan naga gargaara*

*dhibtayada oo dhan inaannu kuwa dhib kasta ku jira ugu gargaari karno gargaarka Ilaah nagu gar-gaaray. Waayo, sida xanuunsigii Masiixu uu noogu badan yahay, sidaas oo kalena gargaarkayagu xagga Masiix wuu noogu badan yahay*." (2 Korintos 1:3-5). Kuwani waa xeerarka joogtada u ah koritaanka adeegga Masiixiyadda. Kol sii horeysay waxaan soo baranay hadba intuu sii kordhayo deganaashaha korritaankeenna waxay la mid tahay mid sii socon doonta geeddi socodkeeda.

## KA GUULEYSIGA CARQALADAHA

Koritaanka masiixiyaddu waa mid micnaheedu ahayn sidii xariiqin toos u jiidan oo calaamaad ahaan lagu muujiyey. Sida caruurta dhalaanka ah oo kale oo wakhtiyada qaar inoogu muuqanayso koritaankooda mid isku xigxiga oo isdaba socda, mararka qaarna hakad uu galo koritaankooda sababa jira awgood. Lakkinse ma jirto mar uu koritaankooda gali karo meel aan la ogaysiin hadana aan liiqliiqliiqeyn oo adag, laakiinse ma jiri karto wakhti koritaanku uu iska socon karo iyada oo uusan khalkhal galin oo aysan soo food saarin carqalad. Kitaabka Quduuska wuxuu marar badan ku soo celceliyaa oo inooga muuqata qofku masiixiga ama

masiixiyiintaba noloshooda xagga ruuxiyadda ay dagaal joogta ah ku jirto oo uga timaaddo saddex wajahaad oo wada jira markaad u kuur gasho mucaaradka ka geeska ah Masiixiyiinta jiidda ay isku horfadhiyaan cadowgaa; waxayna kala yihiin:- Dunida, damaca jidhka iyo shayddaanka. Kuwaasoo idilna dagaalka meel bay uga wada soo jeedaan oo ay kuwada jiraa labdan, guushana aasaas waxaa u ah labdan waxyaalood inaad garato ee kala ah, kow ka uu yahay cadowga iyo wixii qalab ah ee aad isaga celin lahayd inaad haysato ama heli karto nooca uu yahay hubkaad u baahan tahay. Adduunkku dareenkan micnihiisa dunida bani'aadanka iyo waxa ku jira eek u beeran sida ay ahaydba waa ka gees lid ku ah Ilaah. "*Maxaa yeelay, waxa dunida ku jira oo dhan, oo ah damaca indhaha iyo faanka nolsha, xagga aabbah kama yimaadaan ee waxay ka yimaadaan xagga dunida*" (1 Yooxanaa 2:16). Waxayna leedahay xoog awoodeed oo dahaadh damac saaraya aragtideenna Masiixa iyo inuu dilo ruuxiyaddeenna. Tani waxay ahayd wixii ku dhacay Deemaas, mar wuxuu u muuqday mid la shaqeeya rasuul Bawlos "*Iyo Markos, iyo Aristarkhos, iyo Deemaas, iyo Luukos, kuwaas oo ila shaqeeya*" (Filemon Aayadda 24aad). Wuxuuna jeclaaday dunida haatan la joogo "*Waayo, Deemaas intuu dunida haatan la joogo jeclaaday ayuu iga tagay*" (2 Timoteyos 4:10). Laga

yaabaaye waxay ahayd wixii Ciise Masiixa ugu yeedhay markii uu lahaa "*Ka walwalidda dunida iyo sasabidda maalka ayaa hadalka ceejiyey oo wuxuu noqdaa midho la'aan*" (Matayos 13:22). Wuxuuse ilaabay digniintii rasuul Bawlos uga digay inaysan dunida inagu soo ururin eegidda maalkeed keliya "Ha u ekaanina dadka ifkan, laakiinse, ku bedelma cusboonaanta maankiinna inaad hubsataan waxay ay tahay doonista Ilaah oo wanaagsan oo Isaga ku farxo oo kaamilka ah" (Rooma 12:2).

Haddii dunida aysan ahayn xidid ka soo baxay qalbiyadeenna wey boobi doontaa iyaga, waxaa waajibay oo jira in laga jaro haramada cawska ee aan loo baahnay, waa haddii abuurkii wanaagsanaa ee nimcada uu korayo, laakiinse waa maxay haramada [cawska iska soo baxa ee dilaaga ah inaan u isticmaalno mid ku lid ah oo ka soo horjeeda ruuxa]. Haddaba halkan waxaan ku haynaa xoog awood leh oo ka kooban saddexdan qaacido habraaceeda eek u xusan tixraaca Kitaabka Qudduuska.

1. Inaad aqoonsato jacaylkaa dunida inuu yahay cadowga jacaylka Ilaaha Aabbaha ah. , "Dunida iyo waxyaalaha ku jira toona ha jeclaanina. Qof uun hadduu dunida jeclaado, jacaylka Aabaha kuma jiro Isaga" (1 Yooxanaa 2:15). Islamana haysan kartid labadaa, waa

inaad mid un keliya doorataa, oo go'aanso doorashada saxda ah.

2. Xusuuso inay dunida ahayd tii Ciise Masiixa daldashay oo uu u qaatay u naf hurriddii qoriga iskutalaabta si uu adigu kuu soo furto awgeed – "*Laakiinse yaanay noqon inaan wax kale ku faano iskutallaabta Rabbigeenna Ciise Masiix mooyaane, tan dunidu iigu mus-maarantay, anna aan dunida ugu musmaarmay*. (Galatiya 6:14). Sidee baad ula xaajoon kartaa ruuxyada soo diyaariyay shirqoolkii lagu dilay Badbaadiyahaagii?

*3.* Ka ra'yi celinta ka baaraan dageedkeeda xaqiiqda dunidan dareenkeeda waa wax wakhti gaaban ku siman oo cimri gaaban "*Oo dunidan way idlaanaysaa iyo damaceeda; laakiin ka doonista Ilaah yeela wuu jirayaa weligiis*." () 1 Yooxanaa 2:17) mana aha maalgelin laguugu khaalis yeelay. U go'aamid adiga kuu gaar ah intaad ku yeelan lahayd hantida maalka janada. "*Maal ha ku urursanina dhulka, meesha aboorka iyo miridhku ku baabbi'iyaan, iyo meesha tuugaggu jebiyaan oo ka xadaan, laakiin maal ha ku urursanina dhulka, meesha aboorka iyo miridhku ku baabbi'iyaan, iyo meesha tuugaggu jebiyaan oo ka*

*xadaan. Waayo, meesha maalkaagu ku jiro, meeshaasaa qalbigaaguna ku jiri doonaa.*" (Matayos 6:19-21). Oo taasi waxaa wax ka bartay nin la odhan jiray John Newton waayihiisii. '*Farxadaha gaarka ah iyo maalka aan idlaan midna way ogyihiin caruurta Siyoon'* si adag ugu adkee maskaxdaada muuqaaladan u muuqda adoo dhan walba ka eegaya; ha ku qorto nafta ruuxda qofka iyadoo u baaraan degeyso qalbigaaaga, deedna si aad u hesho iney dunida aysan dunida tahay mid aan awood lahayn halka ugu sareysa oo aysan hor istaagi Karin inaba koritaanka nimceysan.

**Jidhka:-** Kitaabka Axdiga Cusub mararka mararka qaar waxaa ku soo noqnoqda tixraaca ' Jidhka, Dhiigga iyo Lafaha' laakiin inta badan qoraalada rasuul Bawlos waxay caawimaad siiyaan xaaladaheena aan ku dhacnay iyo dembiyadeenna nala jooga. Inkasta oo aysan masiixiyiinya ku sii jiri Karin hoggaanka jidhka, taasi oo ah mid uusan sii maamuli Karin oo ugu sii talin Karin dembiyadoodii hore ku dhaqankoodii, iyaguse waa dadkee wali si buuxda loogama xoreynin joogitaanka saameynteeda. Sidaas awgeed, sida wadaad Jermal ahaan jiray

sida uu u dhigay isaga oo leh:- ‘Tan iyo inta aan haysano waxyaalaha sida fudud u guban karo ee inagu saabsan inaga. Waxaan ku qasbanahay inaan dibadda uga soo saarno holaca dabkaa’

Masiixiyiintu kuma kori karaan haddii ay si joogta ah u shidayaan dabkaa gubaya doomist dembiyadooda. Haddaba side baan uga guuleysan karnaa u jan jeedhidda dembiyadnimo kaas oo caqliga dhiman ka sii hooseeya sida caadiga ah ku koritaankaruuxa? Rasuul bawlos baa mar kale inoo keenay gargaar kale oo dheeraad ah. Kaas oo uu ku soo koobay qaybtan oo idil eek u jirta warqaddiisii uu u qoray kaniisaddii reer Kolosay:-

“*Anigoo ah Bawlos, oo ah rasuulkii Ciise Masiix xagga doonista Ilaah, iyo walaalkeen Timoteyos, waxaannu warqaddan u qoraynaa qoduusiinta iyo walaalaha aaminka ah ee Masiixa ku jira oo Kolosay jooga. Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha Aabbeheenna ah. Waxaannu ku mahad naqnaa Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix, annagoo had iyo goorba idiin soo ducay-nayna. Waxaannu maqalnay rumaysadkiinna xagga Ciise Masiix iyo jacaylka aad qoduusiinta oo dhan u qabtaan, rajada jannada laydiin dhigay aawadeed, taas oo aad hore ugu maqasheen hadalka*

*runta ah oo injiilka. Kaasu waa idiin yimid, xataa siduu ugu yimid dunida oo dhan isagoo midho dhalaya oo kordhaya, sida uu idinkana midho idiinku dhalayo oo idiinku kordhayo, tan iyo maalintii aad maqasheen oo aad ogaateen nimcada Ilaah oo runta ku jirta. Sidaasaad ka barateen gacaliyeheenna Ebafras oo addoon nala ah, oo Masiixa u ah midiidin aamin ah aawadeen, kaas oo weliba noo caddeeyey jacaylkiinna Ruuxa ku jira. Sababtaas daraaddeed tan iyo maalintii aannu taas maqalnay ma aannu joojin inaannu idiin soo ducayno. Waxaannu Ilaah idiin baryaynaa inay idinka buuxsanto aqoonta doonistiisa xagga xigmadda iyo waxgarashada Ruuxa oo dhan, inaad u socotaan si Rabbiga istaahisha oo aad wax kasta isaga kaga farxisaan, idinkoo midho ku soo saaraya shuqul kasta oo wanaagsan oo ku sii kordhaya aqoonta Ilaah. Weliba waxaannu Ilaah baryaynaa inaad ku xoogaysataan xoog oo dhan sida uu yahay itaalka ammaantiisu xagga adkaysashada iyo dulqaadashada farxaddu la jirto oo dhan. Mahad baannu u naqaynaa Aabbaha inaga dhigay kuwa istaahila inay ka qayb qaataan dhaxalka qoduusiinta nuurka ku jirta. Isagu waa inaga samata bixiyey xoogga gudcurka, oo wuxuu inoo beddelay boqortooyadii Wiilka jacaylkiisa. kaas oo aynu ku leennahay madaxfurasho ah dembidhaafka. Isagu waa suuraddii Ilaaha aan la arki karin, oo ah curadka uunka*

*oo dhan;  waayo, wax kastaba isagaa uumay, waxyaalaha samooyinka ku jira, iyo waxyaalaha dhulka joogaba, waxyaalaha la arki karo iyo waxyaalaha aan la arki karinba, hadday yihiin carshiyo ama sayidnimo ama madax ama amarro; wax walba isagaa uumay oo loo uumay. Isagu wax kastaba wuu ka horreeyaa. oo wax kastaaba isagay isku haystaan*." (Kolosay 3:1-17).

Ujeedka guud ee qodobadaasi ee farta uu ku fiiqay rasuulku, waxay ahaayeen kuwan:-

A. U daacad ahaanshaha waxyaalaha ku saabsan xiliga la joogo iyo dabeecadaha asal ahaan soo jireenka dambiga inay ku sii socoto naftsaddaada. Bawlos wuxuu ahaa qof ku sifaysan aaminaadda ereyadan aayadaha (Kolosay 1:5-9). Wuxuu ku aqoonsanayaa taa in miraha abuurkoodu yahay sianda, iyo wasakhnimada, iyo kacsi xaaraam ah, damaca sharka leh, hunguri xumaaan, xanaaq iyo cadho, cay iyo hadlaka ceebta ah, been sheegidda. laga yaabee inay ku sii nagaadaan waxyaalahaa Masiixiyiinta oo ay u noqoto halaag iyo balo u ahaatay noloshooda.
B. Bal eeg dambigan sida joogtada u degan oo kuu nool adiga ee aan ku jirin iftiinka muuqaalkaaga, laakiinse

ku jira iftiinka Ilaah. Mid walba iyo dhamaanba dhibkan waxay ku mutaysteen dambiga cadhadiisa (aaydda 6aad).

Xusuus ka aad tahay adigu ka masiix ahaan. Adigu waxaad iskutalaabta kula dul dhimatay, oo laguula aasay Isaga, oo deedna lagula sara - kiciyey Ciise Masiix.
*"Haddaba haddii laydinla soo sara kiciyey Masiix, doondoona waxyaalaha korka yaal, meesha uu Masiixu joogo, isagoofadhiya midigta Ilaah. Ka fikira waxyaalaha korka yaal, hana ka fikirina waxyaalaha dhulka yaal. Waayo, idinku waad dhimateen, oo noloshiinnuna Masiixay kula qarsoon tahay Ilaah.*"(Kolosay 1-3). Labadaraadlaba adigu kuma sii hoos jirtay xukuumada iyo qaynuuka dembiga. "*Waayo, dembigu idiinma talin doono, maxaa yeelay, sharciga kuma hoos jirtaan, laakiinse waxaad ku hoos jirtaan nimcada. Ku hoos jirnaa nimcada, sidaas daraaddeed miyaan dembaabnaa? Yaanay noqon! Ma waydaan ogayn inaad addoommo u tihiin kii aad isu siisaan sida addoommo addeeca, oo aad addoommadiisa tihiin kii aad addeecdaan, ama ha noqoto dembiga idiin kaxeeya xagga dhimashada ama addeecidda idiin kaxaysa xagga xaqnimada? Laakiinse mahad*

*Ilaah baa leh waayo, waxaad ahaan jirteen addoommadii dembiga, haatanse qalbigiinaad ka addeecdeen caynaddii waxbariddii laydin siiyey; oo idinkoo dembiga laydinka xoreeyey, xaqnimada ayaad addoommo u noqoteen."* (Rooma 6:14-18). Iminka waa inaa waa inaad maskaxdaada ku xirtaa Masiix korkiisa oo uu xukumo noloshaada, waana inay si degdeg ah u huwataa aqoonsiga dhalashada muwaadhinimo ee Masiixa oo sidaasna ku ahaato nolol qudduusnimo. Bal eega aayadahan hoos ku qoran: *Haddaba haddii laydinla soo sara kiciyey Masiix, doondoona waxyaalaha korka yaal, meesha uu Masiixu joogo, isagoo fadhiya midigta Ilaah. Ka fikira waxyaalaha korka yaal, hana ka fikirina waxyaalaha dhulka yaal. Waayo, idinku waad dhimateen, oo noloshiinnuna Masiixay kula qarsoon tahay Ilaah. Masiixa oo ah nolosheenna. markuu soo muuqdo, kolkaasaad idinkuna ammaan kula soo muuqan doontaan. --- Been ha isu sheegina, waayo, idinku waad iska xoorteen dabiicaddii hore iyo falimaheediiba, oo waxaad huwateen dabiicaddii cusbayd taas oo loo cusboonaysiinayo aqoon sida ay tahay u ekaanta kan iyada abuuray.* (3:1-4, 9-10.)

A. **DIID DEMBIGA.** Hana la gorgortamin isaga ilaa inta aad ka disho mooyaane. "*Hadaba dila xubnihiina*

*dhulka yaala, kuwaas oo ah sino iyo wasakhnimo iyo kacsi xaaraam ah, iyo damac shar ah, iyo hunguri xumaan, taas oo ah sanam caabudid*" (Kolosay 3:5).

**Nolosha ku buuxi u ekaanshaha dabeecadaha Masiixa –** Dul dhig naxariis iyo roonaan iyo is-hooseysiin iyo qaboobaan iyo dulqaadasho – "*Haddaba sidaas daraaddeed idinku sida kuwa Ilaah doortay oo qoduuska ah oo la jecel yahay, huwada qalbi leh naxariis iyo roonaan iyo is-hoosaysiin iyo qaboobaan iyo dulqaadasho."* (Kolosay 3:12) waddadan ayaad ku dhaafi kartaa oo aad uga yaraan kaga bixi kartaa qolka dembiga sida ku cad aayadahan: "*Haddaba sidaas daraaddeed idinku sida kuwa Ilaah doortay oo qoduuska ah oo la jecel yahay, huwada qalbi leh naxariis iyo roonaan iyo is-hoosaysiin iyo qaboobaan iyo dulqaadasho. Midkiinba midka kale ha u dulqaato oo ha cafiyo, haddii mid ka cabanayo mid kale; xataa sida Rabbiguba idiin cafiyey, idinkuna sidaas oo kale yeela: oo waxyaalahaas oo dhan waxaad ka dul huwataan jacayl, kaas oo ah xidhiidhka kaamil-nimada. Oo nabadda Masiixuna ha ku taliso qalbiyadiinna, taas oo laysugu kiin yeedhay isku jidh keliya; oo mahadnaqayaal ahaada. Oo erayga Masiixu ha idiinku jiro si badan xagga xigmadda oo dhan, idinkoo wax*

*isbaraya oo isku waaninaya sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa, idinkoo Ilaah ugu gabyaya nimcada qalbiyadiinna ku jirta. Oo wax alla wixii aad ku samaysaan hadal ama shuqulba, magaca Rabbi Ciise ku wada sameeya oo Ilaaha Aabbaha ah ugu mahad naqa isaga.*" (Kolosay 3:12-17). Inay koraan ubaxyada beertaada waxay kaaga baahan tahay hawl la taaban karo iyo dhaqaaleeyn joogta ah. Kala duwaanshaha markaad isbarbar dhigto cawska iyu dhirta ee aan la rabin ee beertaada ka shex baxa waa mid isaga korta si caadi ah, oo u baahan in laga jaro oo laga safeeyo dalagga beerta kuugu abuuran farsama ahaan. Haddaba nolosha ruuxiga ku jirta waxaa ku waajibay iyana in lala tacaalo sifeynta caw duureedkeeda (Haramada) iskaga soo baxaysa sida joogtada ah,haddii aad doonayso inay dhasho midho wanaagsan ee koritaanka masiixad qaan qaan gaar ah. Ibliiskuna sida libaax oo kale ayuu u ciyaa buu rasuul butros leeyahay, isagu waa shayddaankuye doonayo inuu cuno oo uu burburiyo rumaysadka masiixiyiinta. Isaguse inagama dhuuman karo inaga , sababta oo ah waxaynu la nimid Masiix. Taa ta ka soo horjeedda ee lidiga ku a, weerarkiisa wuxuu noqon doonaa gabi ahaanba mid dadbka olola ku gubta. "*Isaga hor joogsada, idinkoo iimaankiinna ku adag, oo garanaya in isla dhibaatooyinkaasu ay ku dhacaan walaalahiinna dunida ku*

*jira*." (1 Butros 5:9). Doonistiisuna waxay tahay inuu ina carqaladeeyo koritaankeena iyo inuu ina khiyaaneartoeyo oo been inoo sheego. Wuxuuuna sameeyaa in all intii awoodiisu dhan inuu inaga dhaadhiciyo sidaa dib ugaga soo horjeedsan lahayn Masiix. Wuxuuna isku dayaa inuu inagu qalqaaliyo fikrad naxariis daran dareenka ku aadan Ilaah xagga maskaxdeenna sidii uu ku sameeyey si la mid Xaawo markii ay beerta janada-Eden ay joogtay: "Ilaah miyuu idinku yidhi, waa inaydaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal" (Bilowgii 3:1). Xaqiiqdu se waxay ahayd Ilaah Xaawa wuxuu siiyey fasax ay ku cunto dhamaan midhaha dhirta beerta kuwada yaal oo idil Mid Mooyee (Hal Geed) keliya mooyee. Laakiinse iniintii abuurka fikraddeedii [Murugada waa maxay, ka aamin bixidda ka uu yahay Ilaah ee dadka oo dhan ka aamin baxeen] ee ku abuurantay maskaxdeenna waa Xaawa'e shaydaankii baa khiyaaneeyey iyada. Sida kolkii dambe lagu xusay aayaddan: *"Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu naagtii ku yidhi, Waa maxay waxan aad samaysay? Naagtiina waxay tidhi, Abeesadaa i khiyaanaysay oo anna waan cunay.*" (Bilowgii 3:13). Sideebaa u hor istaagi karnaa shayddaanka? Waa inaan qaadanaa oo aan xiranaa hubka Ilaah uu ina siiyey inaga. Nimcadiisa, Ereygiisa, iyo Injiilkiisa (Warka Wanaagsan ee Ilaah) iyo Xaqnimadiisa. Bal eeg aayadah: "*Oo*

*hubka Ilaah oo dhan qaata, si aad u awooddaan inaad sirta Ibliiska hor istaagtaan. Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwo amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira. Haddaba sidaas daraaddeed hubka Ilaah qaata si aad u awooddaan inaad maalinta sharka iyaga is-hor taagtaan. Oo markaad saas oo dhan yeeshaan aad awooddaan inaad istaagtaan. Haddaba istaaga idinkoo runta dhexda ku  xidhan, oo laabtana laabdhawrka xaqnimada ku xidhan, Oo  cagahana gashan isu diyaarinta injiilka nabadda, oo weliba waxaa kaloo aad qaadataan gaashaanka rumaysadka, kaas oo aad ku awoodaysaan inaad ku wada demisaan kan sharka leh fallaadhihiisa ololaya oo dhan. Oo waxaad qaadataan koofiyadda badbaadada iyo seefta Ruuxa oo ah erayga Ilaah. Markasta Ilaah wax kaga barya Ruuxa baryo iyo duco kastaba, oo taas ku dhawra adkaysasho oo dhan iyo u-ducaynta qodduusiinta oo dhan. Oo anigana iigu soo duceeya in lay siiyo hadal aan afka ku furo inaan cabsila'aan u muujiyo qarsoodiga injiilka, kaas oo aan u ahay mid ergo ah oo silsilad ku xidhan, inaan cabsila'aan ugu hadlo sida igu waajibka ah.*" (Efesos 6:10-20). Dhar xirashada waa si la mid ah siduu Maxiisba sameeyey markuu shayddaanka soo weeraray Isaga

oo uu ku hunguriyoobay inuu khiyaaneeyo Sayidka, weynu karnaa inaguna inaan horjoogsano maalinta sharka, si la mid ah sidiisii oo kale Isaga isku halayntiisii iyo kalsoonida ruuxda uu u hayay Ereyga Ilaah oo ku ahaaday seefta ruuxda iyo ka adkaanshaha shayddaanka. Bal eeg haddana aayadahan:

"*Yooxanaa qudhiisu wuxuu guntanaa dharkiisii dhogorta geel ahaa, oo suun meged ahna dhexduu ku xidhnaa, cuntadiisuna waxay ahayd ayax iyo malab dibadeed ---- Laakiin goortuu arkay qaar badan oo Farrisiin iyo Sadukiinah oo baabtiiskiisa yimid wuxuu ku yidhi, Dhal jilbisay, yaa idiinka digay inaad ka carartaan cadhada imanaysa? --- Haddeer weliba faaska waxaa la dhigay geedaha guntooda. Sidaa darteed geed walba oo aan midho wanaagsan soo bixin waa la gooyaa oo dabkaa lagu tuuraa.*" (Matayos 4:4, 7, 10). Run ahaanshihii Masiixa, hoggaamiyaheena difaaca ayaa inagu dhawro jacaylka Ilaah. "*naf-saddiinna ku haya jacaylka Ilaah, idinkoo sugaya naxariista Rabbigeenna Ciise Masiix oo idin geeynaysa nolosha weligeed ah.*" (Yuudas Aayadda 21aad). Sida ku quma aaminaadda iyo addeecidda Ereygiisa weynu heli karnaa waanuna heysanaa kalsooni walba oo ku jirta hubkaa; horay bay u dhamaatay oo uu uga guul gaaray tijaabadii Rabbigeenna qudhiisa. Rasuul bawlos waxaa u cadaatay in taasi ay

tahaywax si yaab leh u fiican oo ay masiixiyuunta karaan ku hor istaagiddeeda. Inagu labadaraadlaba in badan si fudud u hor istaagnaa isla markii ay ina hor timaaddo. Taasina waxay calaamad u tahay caruurnimadeena, mana aha qaan gaarnimadeenna; taa ishaara bixinteedana waa wax nalugu tijaabiyey kuleylka yare ee ka soo baxaya goobta dagaalka uu ka socdo. U ahaanshaha u ahaaday hor istaagidda waa calaamad ahmiyad muhiim ah u ah koritaanka. Bal weyddii hooyooyinka; wey xusuusan karaan maalintii ugu horeysay ee ilamaheeda cagahiisa uu ku istaagay. Waa wax ku ah sida calaamad dhulka u eg oo ku qodban. Oo la micne ahayd kortiaan dhab ah oo bilaabmay, qiyaas qaadashada deegaaneed (xasilooni) oo timid weeye, oo u soo dhaweysay masrax cusub ee nolol wada jirta. Haddaba taasi waa ta ruuxa dunida ku jirta. Oo kuu suurta galisa ahaanshaha inaad hor istaagto jaribaadyada ku tusaya dabinada uu kuu dhigay cadowga koritaanka ruuxa ee aad adkeysigeeda leedahay iyo ka guul gaariddeeda. Waxaa aha wax laga xumaado, xitaa xiligii Axdiga cusub lagu jiray, qaar ka mid ahaa masiixiyiintii waagaa jirtay waxaa saameeyey dabaylo aad u waaweyn oo kaga yimid kii ka soo horjeeday eek a geeesta ahaa xaggiisii.. waxayse ku sii nagaadeen ruuxa dhalaanimo (sabinimo) markey ahayd inay noqdaan dad waaweyn oo qaan gaar ah:

"*Anna, walaalayaalow, idiinlama aan hadli karin sida idinkoo ruuxa raaca, laakiin idinkoo jidhka raaca sida kuwo ilmo yaryar ah oo ku jira Masiix. Waxaan idin siiyey caano ee idinma aan siin cunto, waayo. Weli ma aydaan cuni karin, haa-tanna weli ma aad kartaan. Maxaa yeelay, weli jidhkaad raac-daan, waayo, intii xaasidnimo iyo ilaaq dhexdiinna ku jiraan, miyaanaydin jidhka raacsanayn oo sida dadka miyaanaydin u soconayn?*" (1 Korintos 3:1-2). "*Waxaannu haysanna waxyaalo badan oo aannu kan kaga hadalno, laakiin waa fasir adag yahay dhegaculayskiinna aawadiis. Wakhtigii aad macallimmo noqon lahaydeen ayaad haddana u baahan tihiin in laydin baro waxyaalaha ugu horreeya ee hadallada Ilaah, oo waxaad noqoteen sidii kuwa caano u baahan ee aan cunto adag u baahnayn. Waayo, mid kasta oo ay cuntadiisu caano tahay aqoon uma laha hadalka xaqnimada, waayo, waa ilmo yar. Laakiin cuntada adag waxaa leh dadka waaweyn oo ah kuwa ku isticmaalidda kaskooda ku kala garta wanaagga iyo xumaanta*." (Cibraanidda 5:11-14).

Bal inyar ka fakir waxyaalaha kaaga soo baxaya sawirkan, xiliga da'da yar lagu jiro ee caruurnimo waa sida fagaare masraxeed oo rayn rayn badan leh; ilmuhu markii sabi yahay oo ay da'diisu aad u yar tahay wuu inaga dhoola caddeysiiyaa

oo faraxad buu inagu beeraa; laakiinse, waa musiibo haddii ay si wacan u kori waayaan xagga jidhka iyo caqligaba. Taasina waxay calaamad u tahay cudur ba'an iyo bukaan soo food saaray ilmahaa. Waxaa oo idilna sababteeda laga qaato qalbiga sareysiinta Kitaabiga ah weeye: "*Taas daraaddeed aynu iska dayno ka-hadlidda waxyaalihii ugu horreeyey ee Masiix, oo hore aynu ugu soconno kaamilnimada, oo yaynaan mar kale dhigin aasaaska ka-toobad-keenidda shuqulladii dhintay, iyo iimaanka xagga Ilaah, iyo waxbaridda baabtiisyada, iyo gacmo-dul-saaridda, iyo saraki-cidda kuwii dhintay, iyo xukunka weligiis ah. Oo tan waynu samayn doonnaa haddii Ilaah idmo*." (Cibraaniyada 6:1-3).

## BAARISTA CAAFIMAAD EE RUUXDA

Ma caafimaad qabtaa oo ma ku koreysaa masiixiyadda? Inta ka horeysa inta aan lagu baarin markaad dhakhtarka u tagtid si baaritaan ugu sameeyo xaaladda caafimaad ee jidhkaaga sida ay caadada ay tahay marka hore wuxuu dhakhtarka ku weydiiyaa su'aalo taxane ah oo isku xiriirsan, wuxuuna kaa qaadaa calaamado yaryar oo khuseeya dhiigga jidhkaaga ama candhuuftaada si shaybaarka loogu eego, oo wuxuu tijaabiyaa

cabirka (garaacidda wadnahaaga heerka uu taagan yahay dhiig karkaaga, indhaha, dhegaha iyo cunaha ayuu kaa eegaa). Barista caafimaad ee Ruuxda ee bogagga inoo soo socda aan ku arki doonno ayaa kaa caawin doonta inaad isaga baarto caafimaadkaadka Ruuxiga oo kuu bidhaamin doonno qaar ka mid ah meelaha uu joogo cabirkiisa caafimaad ka ruuxiga. Kaas oo durbadiiba ama dareeka xilli waxooga dheer qaadan karo daaweysntiisa kaa dalban doonno.

1. **Himolooyinka Ruuxda** – Xaqiiqdii miyaan fahmi karaa in u ekaanshaha Masiixa uu yahay himilada (Ujeedka - Qasdiga) koritaanka masiixiga, taas oo ah mid uu Ilaah go'aankeeda lahaa inay kuu ama ii ahaato! Aniguse qasdigeygana ma yahay is middaas?
2. **Nafaqa leh** – Miyey ii ahaatay in la igu nafaqeeyo cunto dheelli tiran oo caafimaadeysan ee waxbaridda Kitaabka Qudduska waafaqsan? Ma doonayaa se inaan inay dhegesto Qoraalka Kitaabka Qudduuska waxbariddiisa oo adeecayaa ereyadiisa? Mise xiiseynayaa barashadiisa aniga ka shakhsi ahaaneyd? Mase ka qaatay talaabooyin wax kun ool ah oo aan ku hubsanayo nafaqaynta ruuxiga ah, si u dhiganta oo la

mid ah middaan ku hubsado nafaqaynta jidhkayga maalin walba?

3. **Ku noolaasha Erey walba oo afka Ilaah ka soo baxay –** Si joogta ah ma u akhriyaa Kitaabka Qudduuska marwalba, kaas oo ah iftiinka qalbiyada bani'aadanka ku jira? **"***Qorniin kastaa wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda iyo canaanashada, iyo hagaajinta, iyoedbinta xagga xaqnimada; In ninka Ilaah u ahaado mid dhan oo aad loogu diyaariyey shuqul kasta oo wanaagsan*.**"** (2 Timoteyos 3: 16-17). Ayna u ahaan mid aynu ku helno waxbariddiisa u ahaatay ereyga Ilaah, laakiinse weliba lagu xusuusanayo waxa uu yahay ujeedka qorshaihiisa! Ma weyddiistay: I. Waxbarid: Muxuu qoraalkan gaaban ka walax yahay (Aayad, Cutub, iyo Kitaab) oo inaga barayaan waxyaalaha ku saabsan Ilaah iyo dabeecadihiisa, dadka (Aadanaha) ah iyo dembiga, Masiix iyo shaqooyinkiisii, adeegga ruuxa, nolosha masiixiyiinta, ujeedka qorshaha Ilaah, wadajiraka is weheshiga kaniisadda caalimiga ah, baahida dunida?

(I) **Canaanshaha**: Ilaah ma iigu muujiyaa qaar ka mid ah dembiaydayada xagga noloshayda, taas oo u baahaninaan qirto gefkayga oo aan ka toobad keeno? Maxaanse ka baran karaa halkan oo ku saabsan mas'uuliyadda iyo hantida uu Ilaah igu manasystay xagga ku dhaqanka dameystirka masiirkaa.
(II) **Hagaajinta**: Sidey bey qormadan gaaban igaga caawin kartaa inay iga dhigto mid aad ugu dhow wixii uu Ilaah uga talagalay inay u ahaan doonto?

(IV) **Carbiska-Leyliga**: Ma ii sii kordhaysaa u go'doomidda inaan caabudo Ilaaha xaqa iyo runta ah? Farxadeyse ma ku sii kordheysaa waqafka amaantiisa meelaha dadweynaha isugu yimaadaan? Iyo weliba midda ii gaarka ah?

(V) **Adeegga/Khidmada**: Miyaan isku haleeyaa qiimeynta qof ahaneyd ee haddiyadaha Masiix i siiyey ee uu iigu keenay barakooyinka kuwa kale? Ma se ogohay/garanayaa nooca ay yihiin iyo meesha ku haboon tahay iyo sidaan u isticmaali karo hadiyadahaa Ilaahay igu manaystay? Miyeyse i xoojin kartaa si aan ugu adeego wanaagga kuwa kale? Mise waxaan u arkaa inay tahay sida micno mid ku kooban shakhsi ahaan horukacayga jago dakaacadayda xagga ismamulka kaniisadda?

Ma wakhtigayga korideeda dabiiciga ah, dhaqaalahayga hantiyeed, lahaanshaha milkiyeed, idilkoodaba yihiin adeegiisa?

(VI) **Markhaatirfurka** -noloshayda maxay u dhalaal ifeysaa sida iftiinka dunida? Noloshayda ma waxay la mid tahay milixeyn (cusbeyn) gooni looga dhigay aqalkayga iyo qoyskayga ama goobtaan ka shaqeeyo ama wax ka barto, xaafaddaan ku noolahay ama garoomada aan ku ciyaaro? Miyaanse ka duceystaa fursadahaa si aan ugu markhaatifuro Masiixa

(VII) **Isu tagga ururka wehelnimo** – Miyey iga go'an tahay inaan si haboon uga mid noqdo ururka rumeystayaasha Ilaaha (jamaacadda kaniisadda)? Miyaanse wacyi-gelinta taxadarkeeda ogahay axwaasha waxyaalaha noloshayda iyo shakhsiyadeyda u gaarka ah inaysan dhibaateyn masiixiyiinta kale ee aan wada cibaadeysanno oo iga garab adeega? Doonistayda ma tahay la tacaalidda nimcada Ilaah ku dhaqanfalakeeda iyo waxyaabaha khuseeya? Ma isla weyni iyo kibir baa dusha iga haysata? Ama ma ka xishood siineysaa isqarinta waxyaabaha hoose ee ku aasan waxa aan la dooneyn ee qirashada baahideyda? Miyaan ku xisaabiyaa walaalahayaga

masiixiyiinta ah in ka badab isxisaabinteyda aniga qudheeda aan isxisaabiyo? Miyaan si fiican ula shaqo wadaagaa ama ula shaqeeyaa iyaga xagga hawlaha adeegga boqrtooyada Ilaah? Miyaan ku raalli noqdaa haddiyadaha walaalaha kale oo aan uga mahad celiyaa Ilaah nimcadiisa eek u jirta noloshooda? Haybaddeyse masiixiyiinta qaarkood keliya inay i caawiyaan; ama ii ahaani doonaan xal uu Ilaahay igu barakadeeyo?

(VIII) **Gargaarka waxsiinta –** Sidee baan ula qabsan karaa dhabooyinka adag iyo dhibaatooyinka? Miyaan aamin sanahay in waxwaliba ugu wada shaqeeyaan wanaagayga inay ku buuxsanto qorshihiisa siduu ahaa? Miyaan wax ka bartaa tooshka waxsinta mugdiga, ama sida fudud ugu muuqato bogsiintayda markay kaa baxaan?

(IX) **Dabeecadaha horukaca –** Miyaa ku imanayaa sida ay tahay nimcada Ilaah? Sifeynteeda, mudnaant wanaagsan ee qofnimo? Ciise Masiixi se ma igu sifeeyey/caddeeyey sidii inaan barakadaysanahay. Bal eeg aayadahan ku qoran Kitaabka Axdiga Cusub:-

“ *Markuu dadkii badnaa arkay ayuu buur fuulay, markaasuu fadhiistay oo xertiisa ayaa u timid. Kolkaasuu afkiisa kala qaaday oo wax baray, isagoo leh. Waxaa barakadaysan kuwa*

*xagga ruuxa ka masaakiin ah, waayo, boqortooyada jannada iyagaa leh. Waxaa barakaday-san kuwa baroorta, waayo, waa la qalbiqaboojin doonaa. Waxaa barakadaysan kuwa camal qabow, waayo, dhulkay*
*dhaxli doonaan. Waxaa barakadaysan kuwa xaqnimada u gaajaysan oo u harraadsan, waayo, way dhergi' doonaan. Waxaa barakadaysan kuwa naxariista leh, waayo, waa loo naxariisan doonaa. Waxaa barakadaysan kuwa qalbiga ka daahirsan, waayo, Ilaah bay arki doonaan. 9 Waxaa barakadaysan kuwa nabadda ka shaqeeyaa, waayo, waxaa loogu yeedhi doonaa wiilashii Ilaah. Waxaa barakadaysan kuwa xaqnimada aawadeed loo silciyo, waayo, boqortooyada jannada iyagaa leh. Waad barakadaysan tihiin goortii laydin caayo, oo laydin silciyo, oo wax walba oo xun oo been ah laydinka sheego aawaday. Farxa oo reyreeyaa, waayo, jannada abaalgudkiinnu waa ku weyn yahay, waayo, sidaasay u silcin jireen nebiyadii idinka horreeyey."* (Matayos 5:1-12).

(X) **Dhagalugnaanta/Mudeecidda:** Miyaan jeclahay Amarada Ilaah uu i faray oo ay ku sugan tahay aragtida maskaxdayda inay diidan, kana soo horjeeddo wax alle wixii madmadow galin karaa ee khuseeya noloshayda? Haddii aan lahayn axwaal adduun oo badan oo aan ku helay damaca hunguri weynimo,i

xaasidnimo, iyo in badan oo dhuuninimo ah? Haddii aan nolol heer sare heysto, oo aan sayid ahay oo aan ugu saayido darajooyin iyo lacag hanti maal adduun? Ma masiix baa waxaasi? Mase ma ku heli karaa taasi qumanaan aan suuragal ahayn inaan ku noolaado iyada oo aysan jirin jagooyin u gaar ah?

(XI) **Aragtida Dembiga:** Ma doondoonaa inaan maalin walba dilo dembiga, kaa oo ku haray qalbigeyga iyo noloshayda? Miyaanse doondoonaa inaan geliyo nimcooyinka Ciise Masiix?

(XII) Dagaalka Ruuxa miyaan aaminsanahay dhaqdhaqaaqa hawlaha sheydaankuinaysan ahayn mid ku hoos jirta awooddiisa? Mase garanayaa sida caadiga ah farsamooyinkiisa tabeed ee uu u soo maro noloshayda, iyo waxyaabaha ku jira Kitaabka Qudduuska ee iga caawin kara inaan taagnaado ilaalinta ku horjoogsashadiisa markuu i soo weeraro? Miyaan u soo jeedaa is ilaalintayda ka geesta ah isaga waa shayddaankee?

(XIII) **Koritaanka Masiixiyadda:** Xaqiiqdii sida runta ah miyaan u korayaa sida waafaqsan iimaanka Masiixiyadda? Ma

ka mid ahay xubin si buuxda oo rumaysad leh ka tirsan ama ka mid ah kulanka wadajiraka ururka Kaniisadda? Oo weliba ka jirta kuna jirta kana dhaqan galsan nolosha qoyskayga? Oo waliba laga arkayo kana dhex muuqata dhaqdhaqaaqa nolol maalmeydkayga? Iyo weliba ku jirta nolosha gaar ahaanayd ee ii goonida ah ka shakhsi ahaan?

Diiwaanka buugan waxaa weeye tixraaca dooran ee warqadahan dambe iyo buugaagtan yar yar waxay ka soo jeedaan Madbacadda ku siin doonta asaaska asal ahanayd ee Maktabdda khuseysa Koritaanka Ruuxa.

Barashada Kitaabka Qudduuska ee J. Gresham Machen, Axdiga Cusub oo ku cad, lana akhrisan karo faahfaahinta kutubada uu ka kooban yahay Kitaabka Axdiga Cusub. Kula talin sare weeye tani, ta Ilaaha Rabbiga ahna waa tiisa!